
International Labour Office

# Talo soo jeedin ku saabsan HIV iyo AIDS iyo Dunida shaqada, 2010 (No. 200)



ILO AIDS
www.ilo.org/aids

# TALO SOO JEEDIN
# KU SAABSAN HIV IYO AIDS
# IYO DUNIDA SHAQADA,
# 2010 (LAM. 200)

Xuquuqda daabacaadda © Ururka shaqaalaha Adduunka 2010

*Daabacaadda 1aad 2010*

Daabacadaha Xafiiska Shaqaalaha Adduunka waxay ku haysataa xuquuq daabacaad oo hoos timaadda borotokoolka 2aad ee xeerka guud ee xuquuqda daabacaadda. Hase ahaatee, qaybo yar oo iyaga ka mid ah waa la soo saari karaa oggolaansho la'aan, iyada shardi ah in la xuso isha laga laga soo qaatay, Xuquuqaha dib soo saaridda iyo turjumidda waa in codsi loo soo gudbiyaa daabacaadda ILO Publications (Rights and Permissions), International Labour Office, CH-1211 Geneva 22, Switzerland, ama email ahaan: pubdroit@ilo.org. Xafiiska shaqaallaha Adduunka waxa uu soo dhoweynayaa araajidaasi oo kale. Maktabadaha, macaahidda iyo kuwa kale ee isticmaala oo u diiwaangashan ururro leh xuquuq dib u daabicid waxa ay ka sameyn karaan nuqullo taas oo ku xiran sida iyaga loogu siiyo oggolaansho ujeeddadan. Booqo www.ifrro.org si aad u hesho ururada xuquuqaha daabacaadda leh ee dalkaaga gudihiisa.

---

*Talo soo jeedin ku saabsan HIV and AIDS and the world of work, 2010 (No. 200)*
International Labour Office, Geneva, 2010

ISBN: 978-92-2-123819-5 (print); 978-92-2-123820-1 (Web pdf)

HIV / AIDS / occupational health / occupational safety / workers' rights / ILO Recommendation /text
15.04.2

Waxa kale oo logu heli faraa Af Faransii: *Recommandation (n° 200) concernant le VIH et le sida et le monde du travail, 2010* [ISBN 978-92-2-223819-4 (print); 978-92-2-223820-0 (Web pdf)], Geneva, 2010; and in Spanish: *Recomendación sobre el VIH y el sida y el mundo del trabajo, 2010 (núm. 200)* [ISBN 978-92-2-323819-3 (print); 978-92-2-323820-9 (Web pdf)], Geneva, 2010.

*ILO Cataloguing in Publication Data*

---

Magacyada lagu adeegsado qoraallada la daabaco ee ILO, oo waafaqsan hab-dhaqanka Qaramada Midoobey, iyo qoraalka halkaa lagu soo bandhigo ma tusinayaan wax fikrad ah nooca uu doono ha ahaadee oo Xafiiska Shaqaalaha Adduunka qabo oo la xiriira sharciyadda dal, degaan ama dhul ama maamulkiisa, ama la xiriira xuduudihiisa.

Mas'uuliyadda aaraa'da maqaallada, daraasadaha iyo qoraallada kale eee saxiixan waxaa leh oo keliya ciddii qortey, daabaacadda/rashrintuna ma noqoneyso taageero uu Xafiiska Shaqaalaha Adduunka taageerey fikradaha halkaa lagu sheegey.

Marka la xuso magacyada shirikada ama badeecooyin ama geeddi-sococdyo ma tilmaameyso in uu taageerey Xafiiska Shaqaalaha Adduunka, waxaana xusid la'aan kasta oo aan la xusin sharikad, baceeco ama geeddi-socod gaar ah calaamad uma ahaan ansaxin la'aan.

Qoraallada ay nashriadey ILO iyo agabka kale ee elektoronigga ah waxaa laga heli karaa kuwa ugu waaweyn ee buugaagta iibiya iyo Xafiisyada ILO ee dalal badan ku yaalla, ama toos ayaa looga heli karaa ILO Publications, International Labour Office, CH-1211 Geneva 22, Switzerland. Liisaska qoraallada cusub ee la nashriyey waxaa iyaga oo lacag la'aan ah laga helayaa cinwaanka kore ama e-mail loo soo diro: pubvente@ilo.org

Booq website-keenna: www.ilo.org/publns

---

Waxaa lagu daabacay Switzerland MED

# ARAR

Buugyarahani waxa ku dhex jira qoraallada talo soo jeedinta ee ILO ee la xiriira HIV iyo AIDS iyo Dunida Shaqada, 2010 (Lam. 200), iyo Qaraaradii la socdey ee lagu hormarinayey laguna hirgelinayey Talo soo jeedinta kuwaas oo ka tarjumaya taageerada xoogga leh ee Qaybaha Saddexleyda ah ee ILO ay u hayaan.

Faafidda HIV waxa ay ka mid tahay waxa u keena dhibaatooyinka aadka u xun caafimaadka, horumarka iyo dhaqaalaha iyo horumarka bulshada ee ay dunidu maanta wajahayso. Waddamada sida xun uu u saamaysay, waxyeellada HIV iyo AIDS waxa ka lumay sanado badan oo ay horumar kasbadeen, waxa ay minjaxaabisay dhaqaalaha waxaana weliba ay bulshooyinka u keentay degenaansho la'aan. Waxa la filayaa in HIV-gu uu sii ahaado sabab u horseedda dhimasho iyo silic dalal iyo dadyow badan.

HIV waxa uu caqabad weyn ku yahay in la helo shaqo hufan iyo horumar joogta ah. Waxa uu sababay in malaayiin dad ah oo uu haleelay ama la nool HIV iyo AIDS ay naftooda waayaan. Waxyeelladiisu, waxa ay si aad ah ugu badan tahay kooxaha da'da wax soo saarka ku jira, waxa ayna dusha ka saartaa kharash fara badan shirikadaha iyada oo sababta in wax soo saarku uu hoos u dhaco, isla markaana waxa ay kordhisaa qiimaha shaqaalaha iyo in la waayo xirfado iyo waaya-aragnimo. Waxa taasi dheer in xuquuqaha asaasiga ah ee goobta shaqada badanaaba lagu xadgudbo iyada oo sabab looga dhigayo xaalad HIV la hubo ama la fahamsan yahay in ay jirto, gaar ahaan iyada oo takoorid iyo sharafridid ay la kulmaan shaqaalaha la nool iyo kuwa ay saameeyeen HIV iyo AIDS. Waxa taasi ka sii daran, iyada oo ay faafiddu u sii dhaqaaqday xaggii ugu xumayd, gaar ahaan kooxaha qaaday oo ay dhibaato haysato ama la fogeeyo.

Dunida shaqadu waxa ay kaalin muhiim ah ka qaadaneysaa wax ka qabashada HIV iyo AIDS. Waxaa ay bixineysaa bar aad u qiime badan oo laga gali karo si loo gaaro shaqaaalaha haweenka iyo ragga ah oo ku dhex jira xayndaabkan halkaasi oo inta badan ay ku qaataan noloshooda, oo ah goobta shaqada. Horumarinta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada goobta shaqada ee la xiriira HIV iyo AIDS waxa ay fududeeyaan in galaangal loo helo adeegyada ka hortegga, daaweynta iyo xannaanaynta shaqaalaha iyo qoysaskooda iyo kuwa iyaga ku tiirsan, halkaas oo weliba laga sii gaari karo bulsho-weynta. Waxaa weliba kaalinta muhiimka ah ee ay dunida shaqadu ku leedahay wax ka qabashada faafidda cudurka ilaa iyo hadda si fiican loogama faa'iideysan. Haddii la doonayo in si buuxda loogaga faa'iideysto wax ka qabashada cudurka, waxaa muhiim ah in tallaabo laga qaado dunida shaqada ay qayb ka noqoto siyaasadaha iyo barnaamijyada iyo qorsheyaasha/istiraatiijiyadaha qaranka.

Sanadkii 2001kii, ILO waxa ay dhaqangelisay xeer nadaamkii ku saabsanaa HIV/AIDS iyo dunida shaqada, kaas oo la wada oggolaaday laguna isticmaaalo dalal badan. 2007dii, qaybaha uu ururku ka kooban yahay waxa ay go'aan ku gaareen in la gaaray waqtigii kor loo qaadi lahaa waxqabadka dunida shaqada ee HIV iyo AIDS la gaarsiin lahaa heer kale iyada oo la sameynayo lana dhaqangelinayo heer jaangooyo shaqo oo caalami ah. Talo soo jeedintii ka dhalatay lam.200 waxa ay ballanqaadyo cad ka haysataa xubnaha dalalka ka tirsan ILO iyo wakiillada loo-shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha iyaga oo iskaashi dhow la leh ururrada dadka la nool HIV iyo ururrada caalamiga ah ee la shaqeeya, gaar ahaan UNAIDS, si looga

faa'iideysto wax badan ee ay dad ku biirin karto dunida shaqada si loo xaqiijiyo in si guud loo wada helo ka hortag, daaweyn, daryeel iyo taageero.

Talo soo jeedinta waxa ay ka turjumaysaa baahida loo qabo in la xoojiyo dadaallada ka hortagidda ee goobta shaqada iyo in loo fududeeyo dadka la nool ama saameeyeen HIV iyo AIDS in ay si fudud ku gaari karaan daaweynta. Waxa ay ku baaqeysaa in la dejiyo lana hirgeliyo siyaasadaha iyo barnaamijyada goobta shaqada ee sadexlaha ah oo ku saaabsan HIV iyo AIDS iyo in lagu lamaaniyo siyaasadaha iyo qorsheyaasha guud ee qaranka ee la xiriira HIV iyo AIDS iyo horumarinta iyo ilaalinta bulshada. Waxa ay ku baaqeysaa in la xushmeeyo xuquuqaha asaasiga ah ee aadanaha ee shaqaalaha oo dhan, oo ay ka mid tahay in loo hoggaansamo xeerka sinnaanta dheddig-laboodka iyo in xor laga ahaado baaritaan iyo shaac-ka-qaadis khasab ah ee xaaladda HIV ee qof, iyada oo isla markaana la dhiirigelinayo in gof walba uu si sir ah baaritaan iyo la tashi HIV ah u sameeyo, marka ugu horreysa ee ay u suuragasho. Talo soo jeedintu sidaa oo kale waxa ay dalalka xubnaha ka ah ku martiqaadeysaa in ay hirgeliyaan qodobbadeeda iyaga oo wax ka beddelid ku sameynaya ama dhaqangelinaya sharciga qaranka halka ay ku habboon tahay.

Halka ay shaqaaluhu xor ka yihiin sharafrid iyo takoorid marka loo fiiriyo xaaladdooda HIV ee dhabta ah ama laga shakisan yahay, iyaga iyo kuwa iyaga ku tiirsan waxa ay ka faa'iideysanayaan galangal fiican u yeeshaan waxbarasho, wargelin, daaweyn, daryeel iyo taageero la xiriirta HIV ee heerar qaran iyo goob shaqo. Galaangalkani oo kale waxa uu iyaga ku caawinayaa in ay ku gaaraan nolol raagta oo waxtar badan leh iyo in ay wax ku biiriyaan dhaqaalaha dalka iyo bulshada.

Iyada oo ku saleysan talo soo jeedinta iyo Qaraarrada la socda, ILO waxa ka go'an in ay xoojiso waxqabadkeesa ay ku taageerayso hirgelinta ballanqaadyada heer caalami iyo heer qaranba si loo ilaaliyo xuquuqaha iyo sharafta shaqaalaha iyo dhammaan dadka la nool ama ay saameeyeen HIV iyo AIDS.

Geneva, June 2010

Juan Somavia,
Agaasiamaha-Guud

# SHIRWEYNAHA SHAQAALAHA ADDUUNKA

**Talo soo jeedin 200**

## TALO SOO JEEDIN KU SAABSAN HIV IYO AIDS IYO DUNIDA SHAQADA

Shirweynahii guud ee Ururka Shaqaalaha Adduunka,

Oo uu ku qabaty Geneva Guddiga Maamulka ee Xafiiska Shaqaalaha Adduunka, kuna kulmay kal-fadhigoodii 99aad Juun 2010kii, iyo

Iyaga oo xusay in HIV iyo AIDS ay saamayn aad u xun ku leeyihiin bulshada iyo dhaqaalaha, dunida shaqada ee qaybaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn labadaba, shaqaalaha, qoysaskooda iyo dadka kale ee iyaga ku tiirsan, ururrada shaqaalaha iyo xoogsatada iyo hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyo in ay minjaxaabiyaan hufnaanta shaqada iyo horumarka joogta ah, iyo

Iyaga oo sii xaqiijinaya muhimadda ay leedahay kaalinta Ururka Shaqaalaha Addunnka ee wax ka qabashada HIV iyo AIDS ee dunida shaqada iyo baahida loo qabo in Ururku uu xoojiyo dadaaladiisa si loo gaaro caddaalad bulsho iyo si loola dagaalamo takooridda iyo sharafrididda la xiriirta xaaladda HIV iyo AIDS ee dhammaan dhinacyada shaqadeeda iyo waajibaadkeeda, iyo

Iyaga oo dib u xusuusanya muhiimadda ay leedahay in la yareeyo dhaqaalaha dadban iyada oo la helayo shaqo wanaagsan iyo horumar joogta ah isla markaana si wanaagsan loo abaabulo dunida shaqaada ee dhinaca wax ka qabashada HIV iyo AIDS, iyo

Iyaga oo xusaya heerarka aadka u sarreeya ee sinnaan la'aanta dhaqaale iyo bulsho, wargelin iyowacyigelin la'aanta, jiritaan la'aanta sirnimada iyo in si dad fulin aan loo helin loona raacin daaweynta sidii loogu talogaley, in ay kordhiyaan halista isu gudbinta HIV, heerarka dhimashada, tirada carruurta waayaya mid ama labadiisa waalid iyo tirada shaqaalaha ku shaqeeynaya shaqo aan rasmi ahayn, iyo

Iyaga oo u tixgelinaya in saboolnimada, sinnaan la'aan bulsho iyo dhaqaale iyo shaqo la'aantuba ay kordhiyaan halista in aan la helin ka hortag, daaweeyn, daryeel iyo taageero, sidaana ay ku kordhiyaan halista isu gudbibta, iyo

Iyaga oo xusuusanya in sharaf rididda, takooridda iyo shaqo ka saarista ay la kulmaan dadka uu haleelo HIV ama AIDS ay caqabad ku yihiin ogaanshaha qofka uu ogaado xaaladdiisa HIV, sidaasna ay ku kordhiyaan in shaqaaluhu baylahsanaadaan HIV iyo in ay minjaxaabiso xuquuqda ay leeyihiin faa'idooyinka bulshada, iyo

Iyaga oo xusaya in HIV iyo AIDS ay raad xun ku leeyihiin kooxaha nugul iyo kuwa halista ugu jira, iyo,

Iyaga oo xusaya in HIV uu haleelo rag iyo haween labadaba, in kastoo dumarka iyo gabdhaha ay aad ugu halis badan yihiin uguna nugul yihiin HIV marka loo eego ragga iyo in iyaga uu si aad ah u haleelay faafidda HIV marka la barbardhigo ragga taas oo ay sabab u tahay sinnaan la'aanta ragga iyo haweenka, iyo awood-siinta haweenku ay tahay qodob muhiim u ah wax ka qabashada caalamiga ah ee HIV iyo AIDS, iyo

Iyaga oo xusuusanaya muhimadda ay leedahay in shaqaalaaha la ilaaliyo iyada oo la adeegsanayo ammaanka shaqada ee shaamilka ah iyo barnaamijyo caafimaad, iyo

Iyaga oo xusuusanaya qiimaha uu leeyahay xeer nidaam ILO oo ku saabsanaa *HIV/ AIDS iyo shaqada la qabto,* 2001 (*An ILO code of practice on HIV/AIDS and the world of work, 2001*), iyo baahida loo qabo in la adkeeyo saamayntiisa iyada oo la og yahay in ay jiraan xadad iyo dulduleelo hirgelintiisa la xiriira, iyo

Iyaga oo xusuusanya baahida loo qabo in la dhiirrigeliyo lana hirgeliyo Heshiisyada iyo Talooyinka shaqada ee caalamiga ah iyo shuruucda kale ee caalamiga ah ee ku habboon HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada, oo ay ku jiraan kuwa aqoonsanaya in xaq loo leeyahay heerka caafimaad ee ugu sarreeya ee la heli karo si kor loogu qaado heerka nolosha, iyo

Iyaga oo xusuusaya kaalinta gaar ahaaneed ee ururrada shaqqalaha iyo xoogsatada ay ku leeyihiin horumarinta iyo taageeridda dadaallada qaran iyo kuwa caalami ee wax looga qabanayo HIV iyo AIDS shaqada dhexdeeda iyo iyada oo la adeegsanayo shaqooyinka la qabanayo, iyo

Iyaga oo xusaya muhimmadda ay leedahay kaalinta goobta shaqAda marka loo eego wargelin iyo helidda ka hortegid, daaweyn, daryeel iyo taageero ee wax ka qabashada qaranka ee HIV iyo AIDS, iyo

Iyaga oo xaqiijinaya baahida loo qabo in la sii wado lana kordhiyo iskaashiga caalamiga ah, gaara ahaan dhinaca Barnaamijyada Wadaagga ah ee Qaramada Midoobay ee la xiriira HIV iyo AIDS, si loo taageero dadaallada ay dhaqangal ku noqon karto talo soo jeedintan, iyo

Iyaga oo xusaya qiimaha iskaashiga heerar degaan, gobol iyo caalami uu u leeyahay kuwa ka shaqeeya HIV iyo AIDS, oo ay ka mid tahay qaybta caafimaadka iyo ururrada kale ee ku habboon, gaar ahaan shaqsiyaadka matala dadka la nool HIV, iyo

Iyaga oo xaqiijinaya baahida loo qabo in la sameeyo jaangooyo heer caalami ah si loo hago xukuumadaha iyo ururrada loo shaqeeyo iyo xoogsatada ee dhinaca qeexitaanka kaalimahooda iyo mas'uuliyadahooda ee dhammaan heerarka kala duwan, iyo

Iyaga oo go'aasadey ka dib markii la oggolaadey soo jeedinnada qaarkood eek u saabsan HIV iyo AIDS, iyo dunida shaqada, iyo

Iyaga oo go'aansadey in soo jeedintani ay ahaato qaan talo soo jeedin ah;

Waxa ay ansixiyeen maalintan toddoba iyo tobnaad ee Juun sanadka Laba kun iyo toban talo soo jeedintan soo socota, taas oo loo magacaabi doono Talo soo jeedinta HIV iyo AIDS, 2010.

## I. Qeexid

1. Talo soo jeedintan dhexdeeda:

(a) "HIV" Waxa loola jeedaa fayruska baabi'iya difaaca jirka aadanaha, fayrus waxyeelleeya habdhiska difaaca. Caabuqa waxa looga hortegi karaa tallaabooyin ku habboon.

(b) "AIDS" Waxaa loola jeedaa baabi'iyaha difaaca jirka kaas oo ka dhasha marxalado dambe ee caabuqa HIV, waxaana calaamad u ah cudurro fursad gaad ah ama kansar la xiriira HIV, ama labadaba

(c) "Dadka la nool HIV" Macnaheedu waa dadka uu haleelay (qaba) HIV;

(d) "Sharaf-ridid" Macnaheedu waa calaamad bulsheed taas oo, marka lala xiriiriyo qof, badanaaba dhalisa faquuqid ama xanibaad ku keenta in nolol bulsheed buuxda ku naaloodo qofka qaba ama uu haleelay HIV.

(e) “Takoorid” Macnaheedu waa ka soocid, ka reebid ama ku gaar yeelid kasta, taas oo saameyn ku keenta in la tirtiro ama wax loo dhimo u sinaanta fursadaha daaweynta ama shaqaaleynta ama shaqo, sida lagu sheegay shirweynihii (shaqada iyo shaqaalaha) takooridda, 1958, iyo talo soo jeedintii, 1958;

(f) “Dadka uu saameeyey” Macnaheedu waa dadka noloshoodu uu beddeley HIV ama AIDS, waxyeellada ballaaran ee cudurka daraaddeed.

(g) “U fududeyn ilaa xad” Macnaheedu waa wax ka beddelid ama hagaajin kasta oo shaqada ama goobta shaqada lagu sameeyo taas oo ku habboon ama u suuragelisa qofka la nool HIV ama AIDS in uu helo, ama ka qaybqaadato, ama ku kobco, shaqo.

(h) “U nuglaan/baylahsanaan” macnaheedu waa fursadaha aan loo sinnayn, bulshada oo la iska saaro, shaqo la’aan ama shaqo aan sugnayn, oo ka dhalata xaalado bulsho, dhaqan, siyaasadeed iyo dhaqaale oo qofka ka dhigta mid aad ugu nugul caabuqa HIV iyo in uu ugu sii gudbo AIDS ahaan.

(i) “Goob-shaqo” waxa loola jeedaa goob shaqo kasta oo shaqaaluhu ay ku fuliyaan hawshooda, iyo

(j) “Shaqaale” waxa loola jeeda qof kasta oo ku shaqeeya qaab ama heshiis nooca uu doonaba ha ahaadee.

## II.BAAXAD

**2. Talo soo jeedintani waxa ay gaareysaa:**

(a) Dhammaan shaqaalaha ku hoos shaqeeya qaababka ama heshiisyada oo dhan, iyo goob kasta oo shaqo, oo ay ku jiraan:

(i) Shakhsiyaadka ku shaqeeya shaqo ama hawl kasta

(ii) Kuwa ku jira tababar,oo ay ku jiraan kuwa shaqo lagu tababarayo iyo maxaabiista;

(iii) Qof lacag la’aan ku shaqeeya

(iv) shaqo-doon iyo shaqo-soo-codsadeyaal; iyo

(v) Shaqaalaha shaqada la hakiyey/joojiyey

(b) Dhammaan qaybaha hawlaha dhaqaalaha, oo ay ku jiraan qaybaha gaarka loo leeyahay iyo dowladda iyo dhaqaalaha tooska ah iyo kan dadban, iyo

(c) Ciidamada qalabka sida iyokuwa lebisan.

## III. MABAA’DII GUUD

3. Xeerarka guud ee soo socda waa in lagu dabaqaa dhammaan hawlaha la xirira waxa uu dalku ka qabanayo HIV iyo AIDS marka lagu guda jiro shaqooyinka la qabto.

(a) Wax ka qabashada HIV iyo AIDS waa in loo aqoonsadaa in AY qayb ka Tahay aqoonsiga dhammaan xuquuqaha aadanaha iyo xoriyaadka asaasiga ah iyo sinnaanta dheddig-laboodka, oo ay ku jiraan shaqaalahaha, xaasaskooda iyo dadka iyaga ku tiirsan.

(b) HIV iyo AIDS waa in loo aqoonsadaa isla markaana loola dhaqmaa arrin goob shaqo ahaan, kaas oo lagu dari karo qodobbada lagama maarmaanka ah ee heer dowlad, gobol iyo caalami ay wax uga qabanayaan cudurkan halista ah iyada oo si buuxda looga qaybgelinayo ururrada shaqaalaha iyo xoogsatada.

(c) Waa in aannu jirin takoor ama sharaf-rid ka dhan ah shaqaalaha, gaar ahaan kuwa shaqo-doonka ah iyo shaqo codsadeyaasha, iyada oo loo eegaayo in qofku ku sugan yahay xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay ama in ay yihiin

dad ka soo jeeda gobollo dunida ka mid ah ama qaybo dadka ka mid ah kuwaasi oo khatar aad ah ugu jira ama aad ugu nugul caabuqa HIV;

(d) Ka hortagidda dhammaan xaaladaha la isugu gudbiyo HIV waa in la siiyaa mudnaanta asaasiga ah;

(e) Shaqaalaha, xaasaskooda iyo kuwa iyaga ku tiirsanba waa in ay galaangal u helaan kana faa'ideystaan ka hortegidda,daaweynta, daryeelka iyo taagerirada la xiriidha HIV iyo AIDS, iyo in shaqaalaha ay kaalin ka qaataan fududeynta galaangal u lahaanshaha adeegyadaasi;

(f) Ka qaybgalka iyo la socodka shaqaalaha ee dejinta qorshaha, hirgelinta iyo qiimeynta barnaamijyada qaran iyo kuwa goobaha shaqada waa in la aqoonsadaa lana xoojiyaa;

(g) Shaqaaluhu waa in ay ka faai'daystaan barnaamijyada looga hortagayo halisaha gaarka ah ee HIV ee shaqada la isu gudbin karo iyo cuddurrada la isu gudin karo ee isaga la xiriira, sida qaaxada;

(h) ) Shaqaalaha, xaasaskooda iyo kuwa iyaga ku tiirsanba waa in ay ku naaloodaan ilaalinta waxa iyaga gaarka u ah, Kuwaasi oo ay ka mid yihiin sirta la xiriidha HIV iyo AIDS, marka si gaar ah loo eego xaaladdooda HIV ee ay ku sugan yihiin;

(i) Ma jiri karo shaqaale lagu xiro in uu sameeyo baaris HIV ama uu daahfuro xaaladiisa HIV;

(j) Tallaabooyin wax looga qabanayo HIV iyo AIDS inta lagu dhex jiro hawsha la qabto waa in ay ka mid noqdaan siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarineed ee dalka, oo ay ka mid yihiin kuwo la xiriira waxbarashada shaqaalaha , ilaalin bulsheed iyo caafimaad; iyo

(k) In la Ilaaliyo shaqaalaha ka shaqeeya hawlaha ay sida gaar ah khatarta ugu yihiin in la isugu gudbinta HIV.

## IV. SIYAASADAHA IYO BARNAAMIJYADA DALKA

4. Xubnuhu waa in ay:

(a) ansixiyaan siyaasadaha iyo barnaamijyada qaran ee la xiriira HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada iyo bedqabka iyo caafimaadka shaqada la xiriira, meelaha aan weli ka jirin; iyo

(b) In ay ku daraan barnaamijyadooda iyo siyaasadahooda ku wajahaysan HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada qorsheyaasha horumarinta iyo yareynta saboolnimada ee ay ku talagaleen, oo ay ka mid yihiin shaqo hufan, mashaariic joogta ah iyo ku talagal ilo dhaqaale abuurid, sida ay suuragal u tahay.

5. Marka la diyaarinayo siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka, madaxda waaya-aragga ah waa in ay tixgeliyaan xeer nidaamiyaha ILO ee ku saabsanaa HIV/AIDS ee 2001, iyo dib u eegistii kale ee ka dambaysay, qodobbada kale ee munaasibka ah ee Ururka Shaqaalaha Adduunka, iyo tilmaamaha kale ee caalamiga ah ee loo ansixiyey mowduucan.

6. Siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka waa in ay diyaariyaan madax waaya-arag ah, iyaga oo la tashanaya ururrada loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha ee ugu matalaadda badan, sidaa oo kale ururada ka wakiilka ah dadka la nool HIV, iyada oo la tixgelinayo aragtida waaxaha munaasibka u ah, gaar ahaan waaxda caafimaadka.

7. Marka la diyaarinayo siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka, madaxda waaya-aragniada u leh waa in ay tixgeliyaan kaalinta goobta shaqada ay ku leedahay ka

hortegidda, daaweynta, daryeelka iyo taageeridda, oo ay ku jirto sameynta talo-siin iyo baaris uu qofku iskii u doonto, iyaga oo la kaashanaya bulshooyinka degaanka.

8. Xubnuhu waa in ay isku dayaan fursad kasta si ay u faafiyaan wargelinta ku saabsan siyaasadahooda iyo barnaamijyadooda ku aaddan HIV iyo AIDS iyo hawsha la qabto iyaga oo adeegsanaya ururada hay'adaha iyo shaqaalaha, iyo ururrada kale ee ka shaqeeya HIV iyo AIDS iyo kanaalada wargelinta bushada ee kale.

*Takoorid iyo dhiirrigelinta u sinnaanta fursadda iyo isku si ula dhaqmidda*

9. Dowladaha, iyaga oo la tashanaya ururrada wakiilka ka ah loo-shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha waa in ay tixgeliyaan bixinta ilaalin la siman tan lagu xusay shirweynaha takooridda (shaqada iyo shaqaalaha), 1958, si loo hortago takoorid ku salaysan xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay.

10. Xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay waa in aanay noqon wax la isku takooro taasi oo ka hor-is-taageysa shaqaalayn ama shaqo u socotay, ama raadsashada fursado loo siman yahay oo waafaqsan xaaladaha Heshiiska Takooridda (Shaqo iyo shaqaale), 1958.

11. Xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay in aanay noqon sabab shaqada looga saaro. Ka maqnaansho ku meel gaar ah ee shaqada sabab jirro ama waajibaadyo la xiriira xaannanayn la siinayo qof qaba HIV ama AIDS waa in loola dhaqmaa sida loola dhaqmo maqnaanshaha kale ee sababo caafimaad daraadood ah, iyada oo la tixgelinayo Heshiiskii Shaqo ka saaridda, 1982.

12. Marka tallaabooyinka hadda jira ee liddiga ku ah takooridda goobaha shaqada dhexdooda ay yihiin kuwo aan ku filnayn in ay sameeyaan ilaalin wax ku ool ah ee liddi ku ah takooridda la xirirrta HIV iyo AIDS, xubnuhu waa in ay dhaqangeliyaan tallaabooyinkan ama ay soo saaraan kuwo cusub, iyo in ay hubiyaan in si habsami ah oo daahfuran loo hirgeliyey,

13. Dadka qaada cudurrada la xirriirta HIV waa in aan loo diidin suuragalnimada in ay shaqadooda sii wataan, iyaga oo la siinayo degaan macquul ah haddii ay lagama maarmaan noqoto, ilaa iyo inta ay caafimaad ahaan sidaasi ahaan karaan. Waa in la dhiirrigeliyaa tallaabooyin dib loogu meelaynaayo shakhsiyaadkaasi oo kale shaqo ku habboon awooddooda, loo raadiyo shaqo kale iyaga oo lagu tababarayo si loogu fududeeyo in ay shaqada ku soo laaabtaan, iyada oo la tixraacayo qodobbada ku habboon ee Ururka Shaqaalha Adduunka iyo Qaramada Midoobey.

14. Waa in tallaabooyin laga qaadaa goobaha shaqada dhexdooda ama iyaga la isticmaalaa si loo yareeyo isu gudbinta HIV iyo in la yareeyo waxyeelladiisa iyada oo:

(a) la xaqiijinayo in lagu xushmeeyo xuquuqaha aadanaha iyo xoriyaadka asaasiga ah;

(b) la xaqiijinayo sinnaanta dheddi-laboodka iyo awood-siinta haweenka;

(c) La xaqiijinayo ka hortegidda iyo mamnuucidda ficillada rabashadaha wata iyo kuwa aflagaaddada ah ee ka dhaca goobaha shaqada;

(d) La kobcinayo ka wada qaybqaadashada ragga iyo haweenka wax ka qabashada HIV iyo AIDS;

(e) La hormarinayo ka qaybgalka iyo xoojinta dhammaan shaqaalaha iyada oo aan loo eegin jinsi ahaan halka ay u janjeeraan iyo in ay ka soo jeedaan kooxo nugul iyo in kale;

(f) La dhiirrigelinayo ilaalinta caafimaadka galmada iyo kan taranka iyo xuquuqaha galmada iyo taranka ee ay leeyihiin ragga iyo haweenka iyo;

(g) La xaqiijinayo in xogta qofku leeyahay ay tahay qarsoodi, sida xogta caafimaadka

qofka,

*Ka hortag*

15. Qorsheyaasha ka hortagga waa in lagu dabaqaa xaaladaha qaranka iyo nooca goobta, iyo in ay tixgeliyaan arrimaha labada jinsi, bulshada iyo dhaqaalaha.

16. Barnaamijyada ka hortaggu waa in ay xaqiijiyaan:

(a) xog sax ah, tifaftiran, habboon oo waqtiga la socota in la helo taas oo dadka oo dhan ay gaari karaan iyada oo u feejigan dhaqan iyo luqad ahaan dhammaan noocyada warbaahinta kala duwan ee la heli karo.

(b) barnaamijyo waxbarasho waxtar leh si loogu caawiyo haweenka iyo ragga si ay u fahmaan una dhimaan halista dhammaan qaababka la isugu gudbiyo HIV, kuwaasi oo ay ka mid yihiin hooyada oo ilmaheeda u gudbisa iyo in la fahmo muhiimadda ay leedahay in la beddelo dhaqammada halista ah ee la xiriira caabuqa.

(c) tallaabooyin badbaado shaqo iyo caafimaad oo wax ku ool ah la qaaday.

(d) tallaabooyin lagu dhiirrigelinayo shaqaalaha in ay ogaadaan xaaladdooda HIV ee ay ku sugan yihiin iyada oo la isticmaalayo la talin iyo baaritaan qofka iskii u sameeya;

(e) galaangal u lahaanshaha dhammaan hababka ka hortagidda, oo ay ka mid yihiin haseyeeshee aan xad loo yeelin si loo xaqiijiyo helitaanka waxyaabaha lagama maarmaanka ah, gaar ahaan cinjirrada galmada ee ragga iyo haweenka iyo halka ay ku habboon tahay, wargelin ku saabsan sida saxda ah ee loo isticmaalo iyo in la helo daawooyinka la isticmaalo marka qofka ay la soo gudboonaato arrin uu ku qaadi karo cudurka;

(f) t allaabooyin wax ku ool ah si loo yaareyo dhaqammada halistoodu sarreyso, oo ay ka mid yihiin kooxaha inta badan halista ku jira, iyada oo aragtidu tahay in la yareeyo dhacdada HIV, iyo

(g) Qorsheyaasha dhimidda waxyeellada kuwaas oo ku salaysan tilmaamo uu daabacay Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO), Barnaamijka Wadajirka ah ee Qaramada Midoobay oo ku saabsan HIV/AIDS, (UNAIDS) iyo Xafiiska Qaramada Midoobay ee Maandooriyaha iyo Dembiyada (UNODC) iyo tilmaamaha kale ee munaasibka ah.

*Daaweyn iyo daryeel*

17. Xubnuhu waa in ay xaqiijiyaan siyaasadahooda iyo barnaamijyadooda ku saabsan hawlqabadyada caaafimaadka goobta shaqada ee la go'aamiyey iyada oo la tashi lala sameeynayo loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha iyo wakiilladooda iyo in lagu lammaaniyo adeegyada caafimaadka bulshada. Waa in ay bixiyaan waxqabadyo aad u ballaaran oo wax ku ool ah oo habboon si looga hortago HIV iyo AIDS loona maareeyo waxyeelladooda.

18. Xubnuhu waa in ay hubiyaan in shaqaalaha la nool HIV iyo kuwa iyaga ku tiirsan ay ka faai'deystaan galaangal buuxa ee daryeel caafimaad, ha ahaato in tani loo bixiyo qaab caafimaad bulsho, hababka badbaadada bulshada ama caymis gaar loo leeyahay ama qaabab kale. Xubnuhu sidoo kale waa in ay hubiyaan in aqoonta iyo feejignaanta shaqaaluhu kor loo qaaday si loo fududeeyo galaangal u lahaanshahooda daryeelka caafimaadka,

19. Dhammaan dadka hoos yimaada talo soo jeedintani, oo ay ku jiraan shaqaalaha la nool HIV iyo qoysaskooda iyo kuwa iyaga ku tiirsan, waa in ay xaq u yeeshaan adeegyo caafimaad. Adeegyadani waa in ay ku jiraan helitaanka adeeg lacag la'aan ama la iska bixin karo:

(a) La talin iyo baaritaan qofka iskii u sameeyo;

(b) Qaadashada daawada *Antiretroviral* iyo waxbarashada, macluumaadka iyo taageerada la xiriira in daawada loo qaato sidii loogu talogaley;

(c) Nafaqayn wanaagsan oo la socota daaweyn joogta ah;

(d) Daaweynta cudurrada fursad-gaadka ah iyo caabuqyada la isugu gudbiyo galmada, iyo cudurrada kale ee xiriirka la leh HIV, gaar ahaan qaaxada; iyo

(e) Barnaamijyo taageero iyo ka hortag oo loo sameeyo dadka la nool HIV, sida in loo taageero bulsho ahaan.

20. Waa in aannu jirin takoorid liddi ku ah shaqaalaha ama dadka iyaga ku tiirsan kaas oo ku salaysan xaalad sugan ama **malo** ah ee HIV si ay u helaan hababka badbaada bulshada iyo qaababaka caymiska shaqada, oo ay ku jiraan daryeel caafimaad iyo naafinimo, iyo dhimasho iyo faa'idooyin nololeed.

*Taageerid*

21. Barnaamijyo daryeel iyo taageero waa in lagu daraa nidaam dadka la nool HIV ama cudurrada xiriirka la leh ka-qaybgalin macquul ah lagu siinayo goobta shaqada, iyada oo tixgelin gaar ah la siinayo xaaladaha dalka. Shaqadu waa in loo qaabeeyaa hab ay ku qaabili karto in HIV iyo AIDS uu marba marxalad ku jiraaan, iyo dhibaatooyinka suuragalka ay ah in ay la socdaan daaweynta.

22. Xubnuhu waa in ay hormariyaan in shaqada lagu sii hayo iyo in la shaqaaleeyo dadka la nool HIV. Xubnuhu waa in ay tixgeliyaan kordhinta taageerada xilliyada la shaqeeyo iyo kuwa aan la shaqayn, oo ay ka mid yihiin halka ay lagama maarmaan tahay fursado dakhli loogu abuurayo, dadka la nool HIV ama dadka uu saameeyey HIV ama AIDS.

23. Halka la xaqiijin karo in xiriir toos ah uu ka dhexeeyo shaqada iyo halista lagu qaadi karo AIDS ku yimid qaadista caabuqa HIV, waa in loo aqoonsadaa cudur ama shil shaqada la xiriira, si waafaqsan nidaamyada iyo qeexidaha qaranka, iyo iyada oo la tixraacayo Liiska Talo soo jeedinta Cudurada Shaqada, 2002, iyo weliba qodobbada kale ee munaasibka ah ee Ururka Shaqaalaha Adduunka.

*Baarista, waxa khaaska ah, iyo Qarsoodi*

24. Baaristu waa in ay dhab ahaantii ahaataa mid aan la isku khasbin iyo in ay ka madax banaan tahay nooc kasta oo isku khasbid ah iyo in barnaamijyada baaristu ay xushmeeyaan tilmaamaha caalamiga oo ah ee qarsoodi ahaanshaha, la talin iyo oggolaansho helid.

25. Baarista HIV ama nooc kasta oo lagu eegaayo HIV waa in aan la weydiin shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha muhaajiriinta ah, shaqo-doonka iyo shaqo codsadeyaasha.

26. Natiijada baarista HIV waa in ay ahaataa qarsoodi waana in aanay halis gelin in la shaqeeyo, muddada la shaqeynayo, ammaanka shaqada ama fursado horumar lagu tiigsanayo.

27. Shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha muhaajiriinta ah, shaqo doonka, iyo shaqo codsadeyaasha waa in aan laga weydiin dalkooda asalka ah, kan ay ku hakadaan, ama kan ay ku socdaan in ay daah furaan xogta la xiriirta HIV ee iyaga ama kuwo kale khuseysa. Helitaanka xogtani oo kale waa in lagu maamulaa xeerarka qarsoodinimada oo waafaqsan qaanuunka ka dhaqangalay ILO ee ilaalinta xog shakhsiyeedka shaqaalaha, 1997, iyo xeerarka kale ee caalamiga ah ee ilaalinta xogta.

28. Shaqaalaha muhaajiriinta ah, ama kuwa u haajiraan shaqo raadis, waa in aan ka saarin muhaajirnimada dalakooda asalka ah, kan ay ku hakadaan, ama ay kan ay ku socdaan iyada oo la eegayo xaaladdooda HIV ee dhabta ama la malada h

29. Xubnuhu waa in ay lahaadaan habab si fudud loo heli karo oo ay ku xalliyaan cabashooyinka kuwaasi oo xaqiijinaya in loo saxay shaqaalaha haddi xuquuqdooda kor ku xusan lagu xadgudbay.

*Badbaadada iyo caafimaadka Shaqada*

30. Deegaaanka shaqadu waa in uu ahaadaa mid ammaan ah oo caafimaad leh, si

looga hortago isu gudbinta HIV ee goobta shaqada dhexdeeda, iyada oo la tixgelinayo Heshiiska Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada, 1981, iyo Talo soo jeedintii, 1981, Qaabdhismeedka Dhiirrigelineed ee Hashiiska Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada, 2006, iyo Talo soo jeedintii, 2006, iyo shuruucda kale ee caalamiga ah ee munaasibka ah, sida dukumentiga tilmaamaha ah ee ay wada-leeyihiin Xafiiska Shaqaalaha Adduunka iyo WHO.

31. In la qaado tallaabooyin badbaado iyo caafimaad si looga hortago in shaqaalaha ay baylah ay HIV ugu noqdaan goobaha shaqada waana in lagu daraa digniino guud, tallaaabooyin looga hortago shilalka iyo halisaha, sida tallaabooyin hay'adeed, injineeriyadda la xiriira iyo gacan ku qabashada habka loo qabto shaqada, qalab qofku isku ilaaliyo, hadba sida ay ku habboon tahay, tallaabooyin lagu xakamaynayo deegaanka, iyo daawooyinka la qaato marka qofku ay ku dhacdo qaab u ku qaadi karo ka dib iyo tallaabooyinka kale ee lagu badbaado si loo yareeyo halista in la qaado HIV iyo qaaxo, gaar ahaan shaqooyinka aadka halistoodu u badan tahay, taas oo ay qayb ka tahay waaxda daryeelka caafimaadka.

32. Marka ay suuragal tahay u baylahsanaanta HIV ee goob shaqo, shaqaaluhu waa ay ay qaataan waxbarasho iyo tababaro ku saabsan hababka isu gudbinta iyo tallaabooyinka looga hortago baylahnaanta iyo caabuqa. Xubnuhu waa in ay qaadaan tallaabooyin si loo xaqiijiyo in ka hortagid, badbaado iyo caafimaad la bixiyey taas oo loo eegaayo heerkarka ku habboon.

33. Tallaabooyin kor loogu qaadayo wacyiga waa in ay si cad u sheegaan in HIV aan la isugu gudbin jirka oo si caadi ah isu gaara iyo in joogitaanka qof la nool HIV uu joogo goob shaqo aan loo qaadan in ay tahay khatar goob shaqo.

34. Adeegyada caafimaadka shaqada iyo hannaanka goobta shaqada ee la xiriira badbaadada iyo caafimaadka shaqada waa in ay wax ka qabtaan HIV iyo AIDS, iyada oo la tixraacayo Heshiiskii Adeegyadfa Caafimaadka Shaqada, 1985, Talo soo jeedintii, 1985, Rilmaamihii wadaagga ahaa ee ILO/WHO ee Adeegyada Caafimaadka iyo HIV/AIDS, 2005, iyo dib u eegis kasta oo oo ku xigay, iyo qodobbada caalamiga ah ee kale oo ku habboon.

*Carruurta iyo dadka da'da yar*

35. Xubnaha waa in ay qaadaan tallaabooyin lagula dagaalamayo shaqaalaynta iyo ka ganacsiga carruurta taas oo ku keeni karta xubnaha qoyska ama dadka daryeela dhimasho ama cudurro AIDS daraadii iyo in la yareeyo u nuglaanta carruurta ee HIV, iyada oo la tixgelinayo bayaankii ILO ee ku saabsanaa Xeerarka Asaasiga ah iyo Xuquuqaha Goobta Shaqada, 1998, Heshiiska da'da ugu yar ee shaqada, 1973, iyo Talosoojeedintii, 19973, iyo Heshiiskii Noocyada ugu xun ee Shaqaalaynta Carruurta, 1999, iyo Talo soo jeedintii,1999. Tallaabooyin gaar ah waa in la qaadaa si looga ilaaliyo carruurtani xadgudub galmo iyo galmo ugu dul noolaansho.

36. Xubnuhu waa in ay qaadaan tallaabooyin looga ilaalinayo shaqaalaha da'da yar in ay qaadaan caabuqa HIV, iyo in lagu daro baahiyaha gaarka ah ee carruurta iyo dadka da'da yar marka wax looga qabanayo HIV iyo AIDS siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka. Kuwani waa in ay ka mid noqdaan wabarashada caafimaadka ee taranka iyo galmada oo ujeeddo leh, gaar ahaan faafinta wargelinta ku saabsan HIV iyo AIDS iyada oo la adeegsanayo tababar xirfadeed iyo barnaamijyada iyo adeegyo lagu shaqaalaynayo da' yarta.

## V. HIRGELIN

37. Siyaasadaha qaranka iyo barnaamijyada ku saabsan HIV iyo AIDS iyo dunida shaqadu waa in:

(a) la hirgeliyaa, iyada oo lala tashanayo ururrada inta badan matala loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha iyo qaybaha kale ee ay khuseyso, oo ay ka

mid yihiin hay'adaha shaqaalaha caafimaadka ee dowliga ah ama gaarka loo leeyahay ee ku habboon, mid ama tiro ka mid ah hababka soo soosocda oo wadajira:

(i) shuruucda iyo xeerarka qaran

; (ii) heshiis loo dhan yahay;

(iii) siyaasadaha qaranka iyo kuwagoobta shaqada iyo barnaamijyo hawleed, iyo;

(iv) qorsheyaasha waaxaha, iyada oo tixgelin gaar ah la siinayo waaxaha oo ay ku jiraan dadka ay ku saabsan tahay ee aadka halista ugu jira oo talo soo jeedintani khuseyso;

(b) ay ka qaybgalaan maamul garsoor oo karti u leh arrimaha shaqaalaha, iyo madaxda maamulka shaqaalaha ee dhinaca qorshaynta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada, iyo in la siiyo tababar ku saabsan arrintani;

(c) jiraan tallaabooyinka ku jira shuruucda iyo nidaamyada qaranka oo wax looga qabto jebinta waxa qofka u gaarka iyo waxa sirta ah iyo ilaalinta kale ee lagu bixiyey talo soo jeedintani

(d) ay xaqiijiyaan iskaashiga iyo isku- duwidda ka dhexaysa madaxda bulshada iyo adeegyada dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee khuseeya, kuwaasi oo ay jiraan caymis iyo barnaamijyada faa'iidada ama noocyo kale oo barnaamijyo ah.

(e) la hormariyo lana taageero dhammaan shirkadaha si loo hirgeliyo siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka, oo ay ku jirto iyada oo la maro silsiladdadooda sahayda iyo shabakadaha wax qaybinta, isla markaana ay ka qaybqaataan ururrada kuwa loo shaqeeyo iyo shaqaalaha lana xaqiijiyo shirkadaha ka hawlgala waaxyaha lagu habaynayo dhoofinta ay u hoggaansameen.

(f) ay hormariyaan wada hadalka bulshada, oo ay ku jiraan wadatashi iyo wada xaajood, waafaqsan heshiiskii wadatashiga ee saddex qayboodka ahaa (Jaangooyooyinka Ahaqaalaha adduunka), 1976, iyo noocyada kale ee iskaashi ka dhexeeya madaxda xukuumadaha, hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay iyo shaqaalaha iyo wakiilladooda, iyada oo la tixgelinayo aragtida shaqadeed ee shaqaalaha caafimaadka, kuwa takhasusay HIV iyo AIDS, iyo qaybo kale oo ay ka mid yihiin ururrada matela dadka la nool HIV, ururrada caalamiga ah, ururrada bulshada ee ku habboon iyo hannaanka isku duwidda ee dalka.

(g) La dejiyaa, la hirgeliyaa, si joogta ah dib u eegid loogu sameeyaa, loona casriyeeyaa, iyada oo tixgelin la siinayo horumarka ugu casriyeysan ee sayniseed iyo bulsho iyo baahida loo qabo in la dhexgeliyo welwellada la xiriira dheddig-laboodka iyo dhaqanka.

(h) iskaashi lala yeeshaa, marka kuwo kale lagu daro, siyaasadaha iyo barnaamijyada shaqaalaha, waxtarka bulshada iyo caafimaadka; iyo

(i) la xaqiijiyaa in Xubnuhu ay shuruuc macquul ah oo ay hirgelin karaan, iyada oo tixgelin la siinayo xaaladaha qaranka, sidaa oo kale awoodda hay'adaha iyo shaqaalaha.

*Wada-hadal busho*

38. Hirgelinta siyaasaha iyo barnaamijyada ku saabsan HIV iyo AIDS waa in ay ku salaysnaadaan iskaashi iyo is aaminaad ka dhexaysa loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha iyo wakiilladooda, iyo xukuumadaha, iyada oo si firfircoon looga qaybgelinayo, iyaga oo jooga goobahooda shaqo, dadka la nool HIV.

39. Ururrada loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha waa in ay dhiirrigeliyaan ka feejignaanta HIV iyo AIDS, oo ay ku jirto ka hortagga iyo takoorid la'aanta, iyaga oo adeegsanaya waxbarasho iyo wargelin la siiyo xubnaha iyaga ka mid ah. Kuwani waa in ay ku xisaabtamaan welwellada la xiriira dheddig-laboodka iyo dhaqanka,

40. Tababar, tilmaamo badbaado iyo hagid kasta oo lagama maarmaan ah ee ka dhex jirta goobta shaqada lana xiriirta HIV iyi AIDS waa in loo soo bandhigaa qaab u muuqan kara una wada gaari karaan shaqaalaha oo dhan iyo, gaaar ahaan, shaqaalaha muhaajiriinta ah, shaqaalaha cusub ama aan waayo-arag ahayn, shaqaalaha da'da yar, iyo dadka ku jira tababar, sida maxaabiista iyo tababateyaasha. Tababarka, amarrada iyo tilmaamaha waa in ay u feejigan yihin arrima dheddig-laboodka iyo arrimaha dhaqanka waana in la waafajiyaa tilmaamaha shaqaalaha goobta shaqada, iyada oo la tixgelinayo arrimaha halista ku ah xoogagga shaqada.

41. Macuumaad bulsho-shaqaale oo waqtiga la joogo la halmaala oo qaab sayniseed lagu soo ururiyey, iyo, halka ay ku habboon tahay, waxbarasho iyo tabar ku saabsan HIV iyo AIDS waa in loo helaa kuwa loo shaqeeyo, maareyeyaasha iyo wakiillada shaqaalaha, si loogu caawiyo in ay ka qaadaan tallaabooyinka ku habboon goobta shaqada.

42. Shaqaalaha, oo ay ku jiraanm maxaabiista, tababartayaasha iyo kuwa lacag la'aanta ku shaqeeya waa in ay helaan wargelin kor loogu qaadayo wacyigooda iyo tababarrada munaasibka ah ee hababka lagu xakamaynayo caabuqa HIV marka loo eego shilalka ka dhaca goobta shaqada iyo gargaarka degdegga ah. Shaqaalaha ay shaqadoodu ay halis gelinayso in ay baylah u yihiin dhiigga aadanaha, waxyaabaha laga sameeyo dhiiga iyo dheecaannada kale ee jirka waa in ay helaan tababarro dheeraad ah ee looga hortagayo baylahsanaanta, hababka diiwaangelinta baylahnaanta iyo ficillada la samaynayo ka dib marka qofku ay halis uu ku qaadi karo caabuqa ay la soo gudboonaato.

43. Shaqaalaha iyo wakiilladooda waa in ay xaq u leeyihiin in la wargeliyo oo la tashi laga la yeesho tallaabooyinka lagu hirgelinayo siyaasadaha iyo barnaamijyada goobta shaqo ee la xiriira HIV iyo AIDS. Shaqaalaha iyo wakiillada loo shaqeeyaha waa in ay ka qaybqaataan kormeerada goobta shaqo si waafaqsan hawlqabadyada qaranka.

*Adeegyada bulsho*

44. Kaalinta maamulka adeegyada shaqaalaha, oo ay ka mid tahay kormeerka shaqaalaha, iyo madaxda garsoorka ee ku hawlan arrimaha shaqaalaha, si wax looga qabto HIV iyo AIDS, waa in dib u eegis lagu sameeyaa, haddii ay lagama maarmaan noqotana, la xoojiyaa.

45. Qaabdhismeedka adeegyada bulshada waa in la xoojiyaa waana in ay raacaan tilmaamaha wadaagga ah ee WHO/ILO ee ku saabsan adeegyada caafimaadka iyo HIV/AIDS, 2005, iyo dib u eegistii kale ee ka dambeysay, si loo caawiyo xaqiijinta in galaangal ballaaran loo yeeshey ka hortagga, daaweynta, daryeelka iyo taageeridda bukaanka, iyo si looga yareeyo culayska dheeraadka ah ee adeegyada bulshada saaran, gaar ahaan shaqaalaha caafimaadka, kaas oo uu sababey HIV iyo AIDS.

*Iskaashi caalamiga ah*

46. Xubnaha waa in ay iskaashadaan, iyaga oo adeegsanaya heshiisyo laba geesood ama dhinacyo badan, iyaga oo ka qaybgalaya habab dhinacyo badan ama habab kale oo wax ku ool ah, si loo dhaqangeliyo talo soo jeedintani.

47. Tallaabooyin lagu xaqiijinayo galaangal u lahaanshaha adeegyada ka hortagga HIV , iyo daaweyntiisa , daryeelka iyo taageerada shaqaalaha muhaajiriinta ah waa in ay qaadaan dalalka asal ahaan ay ka soo jeedaan, ku hakadaan iyo kuwa ay ku sii jeedaan, iyo in heshiisyo dhexdooda ah ay ka gaaraan waddamada ay khuseyso, mar Allaale markii ay u habboon tahay.

48. Iskaashi caalami ah waa in la dhiirrigeliyaa oo u dhexeeya xubnaha, hay'adahooda qaran ee ku saabsan HIV iyo AIDS iyo ururrada caalamiga ee ku habboon waana in lagu daraa xog ama war is-dhaafsi habeysan oo ku saabsan dhammaan tallaabooyinkii la qaaday si wax looga qabto HIV-ga.

49. Xubnaha iyo ururrada dhinacyada badan waa in feejignaan gaar ah siiyaan iskaashiga iyo kheyraadka lagama maarmaanka ah si loo daboolo baahiyaha dalalka oo

dhan, gaar ahaan dalalka uu ku badan yahay, marka la diyaarinayo qorsheyaasha iyo barnaamijyada caalamiga ah ee ka hortagga, daaweynta, daryeelka iyo taageerada caabuq uu keenay HIV iyo cudurrada fursad-gaadka ah ee kale iyo kansarka la xiriira HIV.

50. Xubnaha iyo ururrada caalamiga ah waa in ay isku dayaan dhimidda qiimaha sahayda nooc kasta oo ay tahay, si looga hortago, loo daaweeyo, loona daryeelo caabuqa uu keenay HIV iyo cudurrada kale ee fursad-gaadka ah iyo kansarka la xiriira HIV.

## VI. LA SOCODKA

51. Xubnaha waa in ay dhisaan qaab ku habboon ama ay ka faai'deystaan kan hadda jira, marka ay kormeerayaan horumarka laga sameeyey marka loo eego siyaasaddooda qaranka ee ku wajahan HIV iyo AIDS iyo shaqada la qabto, sidaa oo kale marka ay sameynayaan talo ku saabsan ansixintiisa iyo hirgelintiisa.

52. Ururrada ka wakiilka ah shaqaalaha iyo xoogsatada ugu badan waa in ay wakiillo ku lahaadaan, iyaga oo siman, hababka loo kormeerayo horumarka la sameeyey marka loo eego siyaasadda qaranka. Waxa kale oo jira, ururradani waa in lagala tashadaa qaabka sida ugu badan ee suuragalka ah, iyada oo la tixgelinayo aragtida ururrada dadka la nool HIV, warbixinnada khubarrada ama daraasado farsameed.

53. Xubnaha waa in, ilaa iyo intii suuragal ah, ay soo ururiyaan war iyo xog xisaabeed faahfaasan iyo in ay ku sameeyaan cilmi-baaris horumarka heerar qaran iyo qaybeed marka loo fiiriyo HIV iyo AIDS ee ku dhex jira dunida shaqada, iyada oo la tixgelinayo sida uu ugu kala badan yahay ragga iyo haweenka iyo qodobboada kale oo u habboon.

54. Iyada oo la raacinayo habka warbixinta ee lagu xusay qodobka 19aad ee Dastuurka Ururka Shaqaalaha Adduunka, dib u eegis joogta ah oo ku saabsan hawlaha la qabtay oo ku salaysan talo soo jeedintani ayaa waxa lagu dari karaa warbixinta qaranka ee loo dirayo UNAIDS iyo warbixinnada ku xusan shuruucda caalamiga ee ku habboon.

## Qaraarro lagu ansixiyey shirweynihii Ururka Shaqaalaha Adduunka kalfadhigiisii 99aad (Geneva, Juun, 2010)

## Qaraar ku saabsan dhiirrigelinta iyo hirgelinta talo soo jeedin la xiriirta HIV iyo AIDS iyo hawsha la qabto, 2010

Shirkii guud ee Ururka Shaqaalaha Adduunka, oo uu ku kulmay kalfadhigiisii 99aad , 2010,

Isaga oo ansixiyey talo soo jeedintii ku saabsanayd HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada, 2010,

Isaga oo xusaya in ka miro dhalinta talo soo jeedintu ay ku xiran tahay habsami u dhiirrigelinta iyo u hirgelinta waxyaabaha iyada lagama maarmaanka u ah,

Isaga oo maanka ku haya waajibaadka ugu muhiimsan ee ururku uu yahay in la la helo shaqo habboon iyo hawl joogto u socota,

Isaga oo ogsoon in uga qaybqaadashada ILO ee Urur Saddex Qayboodle ahaan Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Wadarjirka ah ee HIV iyo AIDS (UNAIDS) ee dadaallada ku wajahan in wax laga qabto HIV iyo AIDS,

1. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka ee Ururka Shaqaalaha Adduunka in la qoondeeyo maaliyadda miisaaniyadda hadda jirta iyo in la raadiyo miisaaniyad kale oo dheeri ah oo wax looga qabanayo hawsha saddexda qaybood ah si ay u dhaqangasho talo soo jeedinta ku dhex jirta dunida shaqada,
2. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka uu tallaabo qaado si loo kobciyo dadaallada iskaashiga ee uu la leeyahay ururrada kala duwan ee caalamka ee la xiriira HIV iyo AIDS iyo Dunida Shaqada
3. Guddiga maamulka u soo jeedinayaa codsi ah in la dhiso qorshe hawleed caalami ah si loo gaaro hirgelin ballaaran ee talo soo jeedinta loona yareeyo saamaynta HIV iyo AIDS ay ku leeyihiin goobta shaqada. Tani waa in lala diyaariyaa wakiillada ururrada loo shaqeeyo iyo kuwa shaqaalaha, iyada oo tixgelin la siinayo aragtiyada UNAIDS, ururrada dadka la nool HIV iyo AIDS, iyo qaybaha ee ku habboon.
4. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka in Agaasimaha Guud uu codsado in dalalka ay siiyaan tixgelin bixinta kharajka loogu talagalay iskaashiga farsamo ee xafiiska. Waddamada xubnaha ka ah, ururrada wakiilka ka ah kuwa loo shaqeeyo iyo shaqaalaha ee ugu badan waxa ay codsan karaan taageero lagu hirgeliyo talo soo jeedinta meelaha sida:
   a) in la helo taageero farsamo oo lagu diyaariyo laguna hirgeliyo siyaasadaha iyo barnaamijyada iyo xeerarka saddexda qaybood ah ee qaranka, si loo gaaro waxyaabaha daruuriga u ah soo jeedintan,
   b) in la siiyo la siiyo taageero awood dhisid ah dhinaca tababaridda, war-gaarsiin, kormeer, hirgelin iyo u qareemeynta, tusaale ahaan:
   (i) in la diyaarinyo barnaamijyo iyo agab tababar si loo dhiso awoodda, oo ay ka mid yihiin kuwo diiradda lagu saarayo waaxo gaar ah;

(ii) in la tababaro horjooyaasha HIV iyo AIDS ee goobta shaqada iyo aqoonyahannada, oo ay ka mid yihiin wakiillada kuwa loo shaqeeyo iyo shaqaalaha iyo maamulayaasha shaqaalaha;

(iii) in la diyaariyo agab dhiirrigelin iyo u-qareemeyn oo la xiriira talo soo jeedinta; iyo

(iv) in la qabto siminaarro iyo tababaro heer qaran ah oo lagu dhiirrigelinayo Talo soo jeedinta.

5. Waxa uu soo jeedinayaa in dowladaha xubnaha ka ah ay adeegsadaan hannaanka hadda jira ama ay dhisaan hannaan kale oo heer qaran ah si dib u eegid loogu sameeyo horumarka la sameeyey, iyo si loo kormeero waxyaabaha soo kordha loona wadaago tusaaleyaasha waxqabadka wanaagsan iyo barnaamijyada qaranka ee ku saabsan HIV iyo AIDS ee ku habboon dunida shaqada.
6. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka in laga codsado warbixinno joogta ah dowladaha xubnaha ka ah taas oo ku saleysan qodobka 19aad ee Dastuurka ILO oo uu qayb ka noqdo hannaanka warbixinta ee hadda jira, gaar ahaan xog ururinta guud. Warbixinnada xukuumadaha ee la xiriira HIV iyo AIDS waa in la diyaariyaa iyada oo la tashi lala samaynayo ururrarda wakiilka ka ah kuwa loo shaqeeyo iyo shaqaalaha, oo ay ka mid yihiin horumarka la sameeyey oo halka ay suuragal ka tahayna, tusaalooyin laga bixiyaa waxa la qabtay.
7. Uu soo jeedinaya Guddiga maamulka in ay si joogta ah dib ugu eegaan horumarka laga sameeyey hirgelinta talo soo jeedinta.
8. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka in dowladaha xubinta ka ah ku dhiirrigeliyo ballaarinta qodobka 1(1)(ii) ee Heshiiska takooridda ( Shaqada iyo Shaqaalaha), 1958, si markaa ilaalinta lagu xusay Heshiiskaa loogu ballaariyo xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay jiritaankeeda.



ISBN 978-92-2-123819-5


9 789221 238195

International
Labour
Office

# Talo soo jeedin

# ku saabsan HIV iyo AIDS

# iyo Dunida shaqada, 2010 (No. 200)



ILO AIDS
www.ilo.org/aids

# TALO SOO JEEDIN
# KU SAABSAN HIV IYO AIDS
# IYO DUNIDA SHAQADA,
# 2010 (LAM. 200)

Xuquuqda daabacaadda © Ururka shaqaalaha Adduunka 2010

*Daabacaadda 1aad 2010*

Daabacadaha Xafiiska Shaqaalaha Adduunka waxay ku haysataa xuquuq daabacaad oo hoos timaadda borotokoolka 2aad ee xeerka guud ee xuquuqda daabacaadda. Hase ahaatee, qaybo yar oo iyaga ka mid ah waa la soo saari karaa oggolaansho la'aan, iyada shardi ah in la xuso isha laga laga soo qaatay, Xuquuqaha dib soo saaridda iyo turjumidda waa in codsi loo soo gudbiyaa daabacaadda ILO Publications (Rights and Permissions), International Labour Office, CH-1211 Geneva 22, Switzerland, ama email ahaan: pubdroit@ilo.org. Xafiiska shaqaallaha Adduunka waxa uu soo dhoweynayaa araajidaasi oo kale. Maktabadaha, macaahidda iyo kuwa kale ee isticmaala oo u diiwaangashan ururro leh xuquuq dib u daabicid waxa ay ka sameyn karaan nuqullo taas oo ku xiran sida iyaga loogu siiyo oggolaansho ujeeddadan. Booqo www.ifrro.org si aad u hesho ururada xuquuqaha daabacaadda leh ee dalkaaga gudihiisa.

---

*Talo soo jeedin ku saabsan HIV and AIDS and the world of work, 2010 (No. 200)*
International Labour Office, Geneva, 2010

ISBN: 978-92-2-123819-5 (print); 978-92-2-123820-1 (Web pdf)

HIV / AIDS / occupational health / occupational safety / workers' rights / ILO Recommendation /text
15.04.2

Waxa kale oo logu heli faraa Af Faransii: *Recommandation (n° 200) concernant le VIH et le sida et le monde du travail, 2010* [ISBN 978-92-2-223819-4 (print); 978-92-2-223820-0 (Web pdf)], Geneva, 2010; and in Spanish: *Recomendación sobre el VIH y el sida y el mundo del trabajo, 2010 (núm. 200)* [ISBN 978-92-2-323819-3 (print); 978-92-2-323820-9 (Web pdf)], Geneva, 2010.

*ILO Cataloguing in Publication Data*

---

Magacyada lagu adeegsado qoraallada la daabaco ee ILO, oo waafaqsan hab-dhaqanka Qaramada Midoobey, iyo qoraalka halkaa lagu soo bandhigo ma tusinayaan wax fikrad ah nooca uu doono ha ahaadee oo Xafiiska Shaqaalaha Adduunka qabo oo la xiriira sharciyadda dal, degaan ama dhul ama maamulkiisa, ama la xiriira xuduudihiisa.

Mas'uuliyadda aaraa'da maqaallada, daraasadaha iyo qoraallada kale eee saxiixan waxaa leh oo keliya ciddii qortey, daabaacadda/rashrintuna ma noqoneyso taageero uu Xafiiska Shaqaalaha Adduunka taageerey fikradaha halkaa lagu sheegey.

Marka la xuso magacyada shirikada ama badeecooyin ama geeddi-sococdyo ma tilmaameyso in uu taageerey Xafiiska Shaqaalaha Adduunka, waxaana xusid la'aan kasta oo aan la xusin sharikad, baceeco ama geeddi-socod gaar ah calaamad uma ahaan ansaxin la'aan.

Qoraallada ay nashriadey ILO iyo agabka kale ee elektoronigga ah waxaa laga heli karaa kuwa ugu waaweyn ee buugaagta iibiya iyo Xafiisyada ILO ee dalal badan ku yaalla, ama toos ayaa looga heli karaa ILO Publications, International Labour Office, CH-1211 Geneva 22, Switzerland. Liisaska qoraallada cusub ee la nashriyey waxaa iyaga oo lacag la'aan ah laga helayaa cinwaanka kore ama e-mail loo soo diro: pubvente@ilo.org

Booq website-keenna: www.ilo.org/publns

---

Waxaa lagu daabacay Switzerland MED

## ARAR

Buugyarahani waxa ku dhex jira qoraallada talo soo jeedinta ee ILO ee la xiriira HIV iyo AIDS iyo Dunida Shaqada, 2010 (Lam. 200), iyo Qaraaradii la socdey ee lagu hormarinayey laguna hirgelinayey Talo soo jeedinta kuwaas oo ka tarjumaya taageerada xoogga leh ee Qaybaha Saddexleyda ah ee ILO ay u hayaan.

Faafidda HIV waxa ay ka mid tahay waxa u keena dhibaatooyinka aadka u xun caafimaadka, horumarka iyo dhaqaalaha iyo horumarka bulshada ee ay dunidu maanta wajahayso. Waddamada sida xun uu u saamaysay, waxyeellada HIV iyo AIDS waxa ka lumay sanado badan oo ay horumar kasbadeen, waxa ay minjaxaabisay dhaqaalaha waxaana weliba ay bulshooyinka u keentay degenaansho la'aan. Waxa la filayaa in HIV-gu uu sii ahaado sabab u horseedda dhimasho iyo silic dalal iyo dadyow badan.

HIV waxa uu caqabad weyn ku yahay in la helo shaqo hufan iyo horumar joogta ah. Waxa uu sababay in malaayiin dad ah oo uu haleelay ama la nool HIV iyo AIDS ay naftooda waayaan. Waxyeelladiisu, waxa ay si aad ah ugu badan tahay kooxaha da'da wax soo saarka ku jira, waxa ayna dusha ka saartaa kharash fara badan shirikadaha iyada oo sababta in wax soo saarku uu hoos u dhaco, isla markaana waxa ay kordhisaa qiimaha shaqaalaha iyo in la waayo xirfado iyo waaya-aragnimo. Waxa taasi dheer in xuquuqaha asaasiga ah ee goobta shaqada badanaaba lagu xadgudbo iyada oo sabab looga dhigayo xaalad HIV la hubo ama la fahamsan yahay in ay jirto, gaar ahaan iyada oo takoorid iyo sharafridid ay la kulmaan shaqaalaha la nool iyo kuwa ay saameeyeen HIV iyo AIDS. Waxa taasi ka sii daran, iyada oo ay faafiddu u sii dhaqaaqday xaggii ugu xumayd, gaar ahaan kooxaha qaaday oo ay dhibaato haysato ama la fogeeyo.

Dunida shaqadu waxa ay kaalin muhiim ah ka qaadaneysaa wax ka qabashada HIV iyo AIDS. Waxaa ay bixineysaa bar aad u qiime badan oo laga gali karo si loo gaaro shaqaaalaha haweenka iyo ragga ah oo ku dhex jira xayndaabkan halkaasi oo inta badan ay ku qaataan noloshooda, oo ah goobta shaqada. Horumarinta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada goobta shaqada ee la xiriira HIV iyo AIDS waxa ay fududeeyaan in galaangal loo helo adeegyada ka hortegga, daaweynta iyo xannaanaynta shaqaalaha iyo qoysaskooda iyo kuwa iyaga ku tiirsan, halkaas oo weliba laga sii gaari karo bulsho-weynta. Waxaa weliba kaalinta muhiimka ah ee ay dunida shaqadu ku leedahay wax ka qabashada faafidda cudurka ilaa iyo hadda si fiican loogama faa'iideysan. Haddii la doonayo in si buuxda loogaga faa'iideysto wax ka qabashada cudurka, waxaa muhiim ah in tallaabo laga qaado dunida shaqada ay qayb ka noqoto siyaasadaha iyo barnaamijyada iyo qorsheyaasha/istiraatiijiyadaha qaranka.

Sanadkii 2001kii, ILO waxa ay dhaqangelisay xeer nadaamkii ku saabsanaa HIV/AIDS iyo dunida shaqada, kaas oo la wada oggolaaday laguna isticmaaalo dalal badan. 2007dii, qaybaha uu ururku ka kooban yahay waxa ay go'aan ku gaareen in la gaaray waqtigii kor loo qaadi lahaa waxqabadka dunida shaqada ee HIV iyo AIDS la gaarsiin lahaa heer kale iyada oo la sameynayo lana dhaqangelinayo heer jaangooyo shaqo oo caalami ah. Talo soo jeedintii ka dhalatay lam.200 waxa ay ballanqaadyo cad ka haysataa xubnaha dalalka ka tirsan ILO iyo wakiillada loo-shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha iyaga oo iskaashi dhow la leh ururrada dadka la nool HIV iyo ururrada caalamiga ah ee la shaqeeya, gaar ahaan UNAIDS, si looga faa'iideysto wax badan ee ay dad ku biirin karto dunida shaqada si loo xaqiijiyo in si guud loo wada helo ka hortag, daaweyn, daryeel iyo taageero.

Talo soo jeedinta waxa ay ka turjumaysaa baahida loo qabo in la xoojiyo dadaallada ka hortagidda ee goobta shaqada iyo in loo fududeeyo dadka la nool ama saameeyeen HIV iyo AIDS in ay si fudud ku gaari karaan daaweynta. Waxa ay ku baaqeysaa in la dejiyo lana hirgeliyo siyaasadaha iyo barnaamijyada goobta shaqada ee sadexlaha ah oo ku saaabsan HIV iyo AIDS iyo in lagu lamaaniyo siyaasadaha iyo qorsheyaasha guud ee qaranka ee la xiriira HIV iyo AIDS iyo horumarinta iyo ilaalinta bulshada. Waxa ay ku baaqeysaa in la xushmeeyo xuquuqaha asaasiga ah ee aadanaha ee shaqaalaha oo dhan, oo ay ka mid tahay in loo hoggaansamo xeerka sinnaanta dheddig-laboodka iyo in xor laga ahaado baaritaan iyo shaac-ka-qaadis khasab ah ee xaaladda HIV ee qof, iyada oo isla markaana la dhiirigelinayo in gof walba uu si sir ah baaritaan iyo la tashi HIV ah u sameeyo, marka ugu horreysa ee ay u suuragasho. Talo soo jeedintu sidaa oo kale waxa ay dalalka xubnaha ka ah ku martiqaadeysaa in ay hirgeliyaan qodobbadeeda iyaga oo wax ka beddelid ku sameynaya ama dhaqangelinaya sharciga qaranka halka ay ku habboon tahay.

Halka ay shaqaaluhu xor ka yihiin sharafrid iyo takoorid marka loo fiiriyo xaaladdooda HIV ee dhabta ah ama laga shakisan yahay, iyaga iyo kuwa iyaga ku tiirsan waxa ay ka faa'iideysanayaan galangal fiican u yeeshaan waxbarasho, wargelin, daaweyn, daryeel iyo taageero la xiriirta HIV ee heerar qaran iyo goob shaqo. Galaangalkani oo kale waxa uu iyaga ku caawinayaa in ay ku gaaraan nolol raagta oo waxtar badan leh iyo in ay wax ku biiriyaan dhaqaalaha dalka iyo bulshada.

Iyada oo ku saleysan talo soo jeedinta iyo Qaraarrada la socda, ILO waxa ka go'an in ay xoojiso waxqabadkeesa ay ku taageerayso hirgelinta ballanqaadyada heer caalami iyo heer qaranba si loo ilaaliyo xuquuqaha iyo sharafta shaqaalaha iyo dhammaan dadka la nool ama ay saameeyeen HIV iyo AIDS.

Geneva, June 2010

Juan Somavia,
Agaasiamaha-Guud

## SHIRWEYNAHA SHAQAALAHA ADDUUNKA

**Talo soo jeedin 200**

## TALO SOO JEEDIN KU SAABSAN HIV IYO AIDS IYO DUNIDA SHAQADA

Shirweynahii guud ee Ururka Shaqaalaha Adduunka,
Oo uu ku qabaty Geneva Guddiga Maamulka ee Xafiiska Shaqaalaha Adduunka, kuna kulmay kal-fadhigoodii 99aad Juun 2010kii, iyo

Iyaga oo xusay in HIV iyo AIDS ay saamayn aad u xun ku leeyihiin bulshada iyo dhaqaalaha, dunida shaqada ee qaybaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn labadaba, shaqaalaha, qoysaskooda iyo dadka kale ee iyaga ku tiirsan, ururrada shaqaalaha iyo xoogsatada iyo hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyo in ay minjaxaabiyaan hufnaanta shaqada iyo horumarka joogta ah, iyo

Iyaga oo sii xaqiijinaya muhimadda ay leedahay kaalinta Ururka Shaqaalaha Addunnka ee wax ka qabashada HIV iyo AIDS ee dunida shaqada iyo baahida loo qabo in Ururku uu xoojiyo dadaaladiisa si loo gaaro caddaalad bulsho iyo si loola dagaalamo takooridda iyo sharafrididda la xiriirta xaaladda HIV iyo AIDS ee dhammaan dhinacyada shaqadeeda iyo waajibaadkeeda, iyo

Iyaga oo dib u xusuusanya muhiimadda ay leedahay in la yareeyo dhaqaalaha dadban iyada oo la helayo shaqo wanaagsan iyo horumar joogta ah isla markaana si wanaagsan loo abaabulo dunida shaqaada ee dhinaca wax ka qabashada HIV iyo AIDS, iyo

Iyaga oo xusaya heerarka aadka u sarreeya ee sinnaan la'aanta dhaqaale iyo bulsho, wargelin iyowacyigelin la'aanta, jiritaan la'aanta sirnimada iyo in si dad fulin aan loo helin loona raacin daaweynta sidii loogu talogaley, in ay kordhiyaan halista isu gudbinta HIV, heerarka dhimashada, tirada carruurta waayaya mid ama labadiisa waalid iyo tirada shaqaalaha ku shaqeeynaya shaqo aan rasmi ahayn, iyo

Iyaga oo u tixgelinaya in saboolnimada, sinnaan la'aan bulsho iyo dhaqaale iyo shaqo la'aantuba ay kordhiyaan halista in aan la helin ka hortag, daaweeyn, daryeel iyo taageero, sidaana ay ku kordhiyaan halista isu gudbibta, iyo

Iyaga oo xusuusanya in sharaf rididda, takooridda iyo shaqo ka saarista ay la kulmaan dadka uu haleelo HIV ama AIDS ay caqabad ku yihiin ogaanshaha qofka uu ogaado xaaladdiisa HIV, sidaasna ay ku kordhiyaan in shaqaaluhu baylahsanaadaan HIV iyo in ay minjaxaabiso xuquuqda ay leeyihiin faa'idooyinka bulshada, iyo

Iyaga oo xusaya in HIV iyo AIDS ay raad xun ku leeyihiin kooxaha nugul iyo kuwa halista ugu jira, iyo,

Iyaga oo xusaya in HIV uu haleelo rag iyo haween labadaba, in kastoo dumarka iyo gabdhaha ay aad ugu halis badan yihiin uguna nugul yihiin HIV marka loo eego ragga iyo in iyaga uu si aad ah u haleelay faafidda HIV marka la barbardhigo ragga taas oo ay sabab u tahay sinnaan la'aanta ragga iyo haweenka, iyo awood-siinta haweenku ay tahay qodob muhiim u ah wax ka qabashada caalamiga ah ee HIV iyo AIDS, iyo

Iyaga oo xusuusanaya muhimadda ay leedahay in shaqaalaaha la ilaaliyo iyada oo la adeegsanayo ammaanka shaqada ee shaamilka ah iyo barnaamijyo caafimaad, iyo

Iyaga oo xusuusanaya qiimaha uu leeyahay xeer nidaam ILO oo ku saabsanaa *HIV/ AIDS iyo shaqada la qabto,* 2001 (*An ILO code of practice on HIV/AIDS and the world of work, 2001*), iyo baahida loo qabo in la adkeeyo saamayntiisa iyada oo la og yahay in ay jiraan xadad iyo dulduleelo hirgelintiisa la xiriira, iyo

Iyaga oo xusuusanya baahida loo qabo in la dhiirrigeliyo lana hirgeliyo Heshiisyada iyo

Talooyinka shaqada ee caalamiga ah iyo shuruucda kale ee caalamiga ah ee ku habboon HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada, oo ay ku jiraan kuwa aqoonsanaya in xaq loo leeyahay heerka caafimaad ee ugu sarreeya ee la heli karo si kor loogu qaado heerka nolosha, iyo

Iyaga oo xusuusaya kaalinta gaar ahaaneed ee ururrada shaqqalaha iyo xoogsatada ay ku leeyihiin horumarinta iyo taageeridda dadaallada qaran iyo kuwa caalami ee wax looga qabanayo HIV iyo AIDS shaqada dhexdeeda iyo iyada oo la adeegsanayo shaqooyinka la qabanayo, iyo

Iyaga oo xusaya muhimmadda ay leedahay kaalinta goobta shaqAda marka loo eego wargelin iyo helidda ka hortegid, daaweyn, daryeel iyo taageero ee wax ka qabashada qaranka ee HIV iyo AIDS, iyo

Iyaga oo xaqiijinaya baahida loo qabo in la sii wado lana kordhiyo iskaashiga caalamiga ah, gaara ahaan dhinaca Barnaamijyada Wadaagga ah ee Qaramada Midoobay ee la xiriira HIV iyo AIDS, si loo taageero dadaallada ay dhaqangal ku noqon karto talo soo jeedintan, iyo

Iyaga oo xusaya qiimaha iskaashiga heerar degaan, gobol iyo caalami uu u leeyahay kuwa ka shaqeeya HIV iyo AIDS, oo ay ka mid tahay qaybta caafimaadka iyo ururrada kale ee ku habboon, gaar ahaan shaqsiyaadka matala dadka la nool HIV, iyo

Iyaga oo xaqiijinaya baahida loo qabo in la sameeyo jaangooyo heer caalami ah si loo hago xukuumadaha iyo ururrada loo shaqeeyo iyo xoogsatada ee dhinaca qeexitaanka kaalimahooda iyo mas'uuliyadahooda ee dhammaan heerarka kala duwan, iyo

Iyaga oo go'aasadey ka dib markii la oggolaadey soo jeedinnada qaarkood eek u saabsan HIV iyo AIDS, iyo dunida shaqada, iyo

Iyaga oo go'aansadey in soo jeedintani ay ahaato qaan talo soo jeedin ah;

Waxa ay ansixiyeen maalintan toddoba iyo tobnaad ee Juun sanadka Laba kun iyo toban talo soo jeedintan soo socota, taas oo loo magacaabi doono Talo soo jeedinta HIV iyo AIDS, 2010.

## I. Qeexid

1. Talo soo jeedintan dhexdeeda:

(a) "HIV" Waxa loola jeedaa fayruska baabi'iya difaaca jirka aadanaha, fayrus waxyeelleeya habdhiska difaaca. Caabuqa waxa looga hortegi karaa tallaabooyin ku habboon.

(b) "AIDS" Waxaa loola jeedaa baabi'iyaha difaaca jirka kaas oo ka dhasha marxalado dambe ee caabuqa HIV, waxaana calaamad u ah cudurro fursad gaad ah ama kansar la xiriira HIV, ama labadaba

(c) "Dadka la nool HIV" Macnaheedu waa dadka uu haleelay (qaba) HIV;

(d) "Sharaf-ridid" Macnaheedu waa calaamad bulsheed taas oo, marka lala xiriiriyo qof, badanaaba dhalisa faquuqid ama xanibaad ku keenta in nolol bulsheed buuxda ku naaloodo qofka qaba ama uu haleelay HIV.

(e) "Takoorid" Macnaheedu waa ka soocid, ka reebid ama ku gaar yeelid kasta, taas oo saameyn ku keenta in la tirtiro ama wax loo dhimo u sinaanta fursadaha daaweynta ama shaqaaleynta ama shaqo, sida lagu sheegay shirweynihii (shaqada iyo shaqaalaha) takooridda, 1958, iyo talo soo jeedintii, 1958;

(f) "Dadka uu saameeyey" Macnaheedu waa dadka noloshoodu uu beddeley HIV ama AIDS, waxyeellada ballaaran ee cudurka daraaddeed.

(g) "U fududeyn ilaa xad" Macnaheedu waa wax ka beddelid ama hagaajin kasta oo shaqada ama goobta shaqada lagu sameeyo taas oo ku habboon ama u suuragelisa qofka la nool HIV ama AIDS in uu helo, ama ka qaybqaadato, ama

ku kobco, shaqo.

(h) "U nuglaan/baylahsanaan" macnaheedu waa fursadaha aan loo sinnayn, bulshada oo la iska saaro, shaqo la'aan ama shaqo aan sugnayn, oo ka dhalata xaalado bulsho, dhaqan, siyaasadeed iyo dhaqaale oo qofka ka dhigta mid aad ugu nugul caabuqa HIV iyo in uu ugu sii gudbo AIDS ahaan.

(i) "Goob-shaqo" waxa loola jeedaa goob shaqo kasta oo shaqaaluhu ay ku fuliyaan hawshooda, iyo

(j) "Shaqaale" waxa loola jeeda qof kasta oo ku shaqeeya qaab ama heshiis nooca uu doonaba ha ahaadee.

## II.BAAXAD

**2. Talo soo jeedintani waxa ay gaareysaa:**

(a) Dhammaan shaqaalaha ku hoos shaqeeya qaababka ama heshiisyada oo dhan, iyo goob kasta oo shaqo, oo ay ku jiraan:

(i) Shakhsiyaadka ku shaqeeya shaqo ama hawl kasta

(ii) Kuwa ku jira tababar,oo ay ku jiraan kuwa shaqo lagu tababarayo iyo maxaabiista;

(iii) Qof lacag la'aan ku shaqeeya

(iv) shaqo-doon iyo shaqo-soo-codsadeyaal; iyo

(v) Shaqaalaha shaqada la hakiyey/joojiyey

(b) Dhammaan qaybaha hawlaha dhaqaalaha, oo ay ku jiraan qaybaha gaarka loo leeyahay iyo dowladda iyo dhaqaalaha tooska ah iyo kan dadban, iyo

(c) Ciidamada qalabka sida iyokuwa lebisan.

## III. MABAA'DII GUUD

3. Xeerarka guud ee soo socda waa in lagu dabaqaa dhammaan hawlaha la xirira waxa uu dalku ka qabanayo HIV iyo AIDS marka lagu guda jiro shaqooyinka la qabto.

(a) Wax ka qabashada HIV iyo AIDS waa in loo aqoonsadaa in AY qayb ka Tahay aqoonsiga dhammaan xuquuqaha aadanaha iyo xoriyaadka asaasiga ah iyo sinnaanta dheddig-laboodka, oo ay ku jiraan shaqaalahaha, xaasaskooda iyo dadka iyaga ku tiirsan.

(b) HIV iyo AIDS waa in loo aqoonsadaa isla markaana loola dhaqmaa arrin goob shaqo ahaan, kaas oo lagu dari karo qodobbada lagama maarmaanka ah ee heer dowlad, gobol iyo caalami ay wax uga qabanayaan cudurkan halista ah iyada oo si buuxda looga qaybgelinayo ururrada shaqaalaha iyo xoogsatada.

(c) Waa in aannu jirin takoor ama sharaf-rid ka dhan ah shaqaalaha, gaar ahaan kuwa shaqo-doonka ah iyo shaqo codsadeyaasha, iyada oo loo eegaayo in qofku ku sugan yahay xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay ama in ay yihiin dad ka soo jeeda gobollo dunida ka mid ah ama qaybo dadka ka mid ah kuwaasi oo khatar aad ah ugu jira ama aad ugu nugul caabuqa HIV;

(d) Ka hortagidda dhammaan xaaladaha la isugu gudbiyo HIV waa in la siiyaa mudnaanta asaasiga ah;

(e) Shaqaalaha, xaasaskooda iyo kuwa iyaga ku tiirsanba waa in ay galaangal u helaan kana faa'ideystaan ka hortegidda,daaweynta, daryeelka iyo taageerirada la xiriidha HIV iyo AIDS, iyo in shaqaalaha ay kaalin ka qaataan fududeynta galaangal u lahaanshaha adeegyadaasi;

(f) Ka qaybgalka iyo la socodka shaqaalaha ee dejinta qorshaha, hirgelinta iyo qiimeynta barnaamijyada qaran iyo kuwa goobaha shaqada waa in la aqoonsadaa lana xoojiyaa;

(g) Shaqaaluhu waa in ay ka faai'daystaan barnaamijyada looga hortagayo halisaha gaarka ah ee HIV ee shaqada la isu gudbin karo iyo cuddurrada la isu gudin karo ee isaga la xiriira, sida qaaxada;

(h) ) Shaqaalaha, xaasaskooda iyo kuwa iyaga ku tiirsanba waa in ay ku naaloodaan ilaalinta waxa iyaga gaarka u ah, Kuwaasi oo ay ka mid yihiin sirta la xiriidha HIV iyo AIDS, marka si gaar ah loo eego xaaladdooda HIV ee ay ku sugan yihiin;

(i) Ma jiri karo shaqaale lagu xiro in uu sameeyo baaris HIV ama uu daahfuro xaaladiisa HIV;

(j) Tallaabooyin wax looga qabanayo HIV iyo AIDS inta lagu dhex jiro hawsha la qabto waa in ay ka mid noqdaan siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarineed ee dalka, oo ay ka mid yihiin kuwo la xiriira waxbarashada shaqaalaha , ilaalin bulsheed iyo caafimaad; iyo

(k) In la Ilaaliyo shaqaalaha ka shaqeeya hawlaha ay sida gaar ah khatarta ugu yihiin in la isugu gudbinta HIV.

## IV. SIYAASADAHA IYO BARNAAMIJYADA DALKA

4. Xubnuhu waa in ay:

(a) ansixiyaan siyaasadaha iyo barnaamijyada qaran ee la xiriira HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada iyo bedqabka iyo caafimaadka shaqada la xiriira, meelaha aan weli ka jirin; iyo

(b) In ay ku daraan barnaamijyadooda iyo siyaasadahooda ku wajahaysan HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada qorsheyaasha horumarinta iyo yareynta saboolnimada ee ay ku talagaleen, oo ay ka mid yihiin shaqo hufan, mashaariic joogta ah iyo ku talagal ilo dhaqaale abuurid, sida ay suuragal u tahay.

5. Marka la diyaarinayo siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka, madaxda waaya-aragga ah waa in ay tixgeliyaan xeer nidaamiyaha ILO ee ku saabsanaa HIV/AIDS ee 2001, iyo dib u eegistii kale ee ka dambaysay, qodobbada kale ee munaasibka ah ee Ururka Shaqaalaha Adduunka, iyo tilmaamaha kale ee caalamiga ah ee loo ansixiyey mowduucan.

6. Siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka waa in ay diyaariyaan madax waaya-arag ah, iyaga oo la tashanaya ururrada loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha ee ugu matalaadda badan, sidaa oo kale ururada ka wakiilka ah dadka la nool HIV, iyada oo la tixgelinayo aragtida waaxaha munaasibka u ah, gaar ahaan waaxda caafimaadka.

7. Marka la diyaarinayo siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka, madaxda waaya-aragniada u leh waa in ay tixgeliyaan kaalinta goobta shaqada ay ku leedahay ka hortegidda, daaweynta, daryeelka iyo taageeridda, oo ay ku jirto sameynta talo-siin iyo baaris uu qofku iskii u doonto, iyaga oo la kaashanaya bulshooyinka degaanka.

8. Xubnuhu waa in ay isku dayaan fursad kasta si ay u faafiyaan wargelinta ku saabsan siyaasadahooda iyo barnaamijyadooda ku aaddan HIV iyo AIDS iyo hawsha la qabto iyaga oo adeegsanaya ururada hay'adaha iyo shaqaalaha, iyo ururrada kale ee ka shaqeeya HIV iyo AIDS iyo kanaalada wargelinta bushada ee kale.

*Takoorid iyo dhiirrigelinta u sinnaanta fursadda iyo isku si ula dhaqmidda*

9. Dowladaha, iyaga oo la tashanaya ururrada wakiilka ka ah loo-shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha waa in ay tixgeliyaan bixinta ilaalin la siman tan lagu xusay shirweynaha takooridda (shaqada iyo shaqaalaha), 1958, si loo hortago takoorid ku salaysan xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay.

10. Xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay waa in aanay noqon wax la isku takooro taasi oo ka hor-is-taageysa shaqaalayn ama shaqo u socotay, ama raadsashada fursado

loo siman yahay oo waafaqsan xaaladaha Heshiiska Takooridda (Shaqo iyo shaqaale), 1958.

11. Xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay in aanay noqon sabab shaqada looga saaro. Ka maqnaansho ku meel gaar ah ee shaqada sabab jirro ama waajibaadyo la xiriira xaannanayn la siinayo qof qaba HIV ama AIDS waa in loola dhaqmaa sida loola dhaqmo maqnaanshaha kale ee sababo caafimaad daraadood ah, iyada oo la tixgelinayo Heshiiskii Shaqo ka saaridda, 1982.

12. Marka tallaabooyinka hadda jira ee liddiga ku ah takooridda goobaha shaqada dhexdooda ay yihiin kuwo aan ku filnayn in ay sameeyaan ilaalin wax ku ool ah ee liddi ku ah takooridda la xirirrta HIV iyo AIDS, xubnuhu waa in ay dhaqangeliyaan tallaabooyinkan ama ay soo saaraan kuwo cusub, iyo in ay hubiyaan in si habsami ah oo daahfuran loo hirgeliyey,

13. Dadka qaada cudurrada la xirriirta HIV waa in aan loo diidin suuragalnimada in ay shaqadooda sii wataan, iyaga oo la siinayo degaan macquul ah haddii ay lagama maarmaan noqoto, ilaa iyo inta ay caafimaad ahaan sidaasi ahaan karaan. Waa in la dhiirrigeliyaa tallaabooyin dib loogu meelaynaayo shakhsiyaadkaasi oo kale shaqo ku habboon awooddooda, loo raadiyo shaqo kale iyaga oo lagu tababarayo si loogu fududeeyo in ay shaqada ku soo laaabtaan, iyada oo la tixraacayo qodobbada ku habboon ee Ururka Shaqaalha Adduunka iyo Qaramada Midoobey.

14. Waa in tallaabooyin laga qaadaa goobaha shaqada dhexdooda ama iyaga la isticmaalaa si loo yareeyo isu gudbinta HIV iyo in la yareeyo waxyeelladiisa iyada oo:

(a) la xaqiijinayo in lagu xushmeeyo xuquuqaha aadanaha iyo xoriyaadka asaasiga ah;

(b) la xaqiijinayo sinnaanta dheddi-laboodka iyo awood-siinta haweenka;

(c) La xaqiijinayo ka hortegidda iyo mamnuucidda ficillada rabashadaha wata iyo kuwa aflagaaddada ah ee ka dhaca goobaha shaqada;

(d) La kobcinayo ka wada qaybqaadashada ragga iyo haweenka wax ka qabashada HIV iyo AIDS;

(e) La hormarinayo ka qaybgalka iyo xoojinta dhammaan shaqaalaha iyada oo aan loo eegin jinsi ahaan halka ay u janjeeraan iyo in ay ka soo jeedaan kooxo nugul iyo in kale;

(f) La dhiirrigelinayo ilaalinta caafimaadka galmada iyo kan taranka iyo xuquuqaha galmada iyo taranka ee ay leeyihiin ragga iyo haweenka iyo;

(g) La xaqiijinayo in xogta qofku leeyahay ay tahay qarsoodi, sida xogta caafimaadka qofka,

*Ka hortag*

15. Qorsheyaasha ka hortagga waa in lagu dabaqaa xaaladaha qaranka iyo nooca goobta, iyo in ay tixgeliyaan arrimaha labada jinsi, bulshada iyo dhaqaalaha.

16. Barnaamijyada ka hortaggu waa in ay xaqiijiyaan:

(a) xog sax ah, tifaftiran, habboon oo waqtiga la socota in la helo taas oo dadka oo dhan ay gaari karaan iyada oo u feejigan dhaqan iyo luqad ahaan dhammaan noocyada warbaahinta kala duwan ee la heli karo.

(b) barnaamijyo waxbarasho waxtar leh si loogu caawiyo haweenka iyo ragga si ay u fahmaan una dhimaan halista dhammaan qaababka la isugu gudbiyo HIV, kuwaasi oo ay ka mid yihiin hooyada oo ilmaheeda u gudbisa iyo in la fahmo muhiimadda ay leedahay in la beddelo dhaqammada halista ah ee la xiriira caabuqa.

(c) tallaabooyin badbaado shaqo iyo caafimaad oo wax ku ool ah la qaaday.

(d) tallaabooyin lagu dhiirrigelinayo shaqaalaha in ay ogaadaan xaaladdooda HIV ee ay ku sugan yihiin iyada oo la isticmaalayo la talin iyo baaritaan qofka iskii u sameeya;

(e) galaangal u lahaanshaha dhammaan hababka ka hortagidda, oo ay ka mid yihiin haseyeeshee aan xad loo yeelin si loo xaqiijiyo helitaanka waxyaabaha lagama maarmaanka ah, gaar ahaan cinjirrada galmada ee ragga iyo haweenka iyo halka ay ku habboon tahay, wargelin ku saabsan sida saxda ah ee loo isticmaalo iyo in la helo daawooyinka la isticmaalo marka qofka ay la soo gudboonaato arrin uu ku qaadi karo cudurka;

(f) t allaabooyin wax ku ool ah si loo yaareyo dhaqammada halistoodu sarreyso, oo ay ka mid yihiin kooxaha inta badan halista ku jira, iyada oo aragtidu tahay in la yareeyo dhacdada HIV, iyo

(g) Qorsheyaasha dhimidda waxyeellada kuwaas oo ku salaysan tilmaamo uu daabacay Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO), Barnaamijka Wadajirka ah ee Qaramada Midoobay oo ku saabsan HIV/AIDS, (UNAIDS) iyo Xafiiska Qaramada Midoobay ee Maandooriyaha iyo Dembiyada (UNODC) iyo tilmaamaha kale ee munaasibka ah.

*Daaweyn iyo daryeel*

17. Xubnuhu waa in ay xaqiijiyaan siyaasadahooda iyo barnaamijyadooda ku saabsan hawlqabadyada caaafimaadka goobta shaqada ee la go'aamiyey iyada oo la tashi lala sameeynayo loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha iyo wakiilladooda iyo in lagu lammaaniyo adeegyada caafimaadka bulshada. Waa in ay bixiyaan waxqabadyo aad u ballaaran oo wax ku ool ah oo habboon si looga hortago HIV iyo AIDS loona maareeyo waxyeelladooda.

18. Xubnuhu waa in ay hubiyaan in shaqaalaha la nool HIV iyo kuwa iyaga ku tiirsan ay ka faai'deystaan galaangal buuxa ee daryeel caafimaad, ha ahaato in tani loo bixiyo qaab caafimaad bulsho, hababka badbaadada bulshada ama caymis gaar loo leeyahay ama qaabab kale. Xubnuhu sidoo kale waa in ay hubiyaan in aqoonta iyo feejignaanta shaqaaluhu kor loo qaaday si loo fududeeyo galaangal u lahaanshahooda daryeelka caafimaadka,

19. Dhammaan dadka hoos yimaada talo soo jeedintani, oo ay ku jiraan shaqaalaha la nool HIV iyo qoysaskooda iyo kuwa iyaga ku tiirsan, waa in ay xaq u yeeshaan adeegyo caafimaad. Adeegyadani waa in ay ku jiraan helitaanka adeeg lacag la'aan ama la iska bixin karo:

(a) La talin iyo baaritaan qofka iskii u sameeyo;

(b) Qaadashada daawada *Antiretroviral* iyo waxbarashada, macluumaadka iyo taageerada la xiriira in daawada loo qaato sidii loogu talogaley;

(c) Nafaqayn wanaagsan oo la socota daaweyn joogta ah;

(d) Daaweynta cudurrada fursad-gaadka ah iyo caabuqyada la isugu gudbiyo galmada, iyo cudurrada kale ee xiriirka la leh HIV, gaar ahaan qaaxada; iyo

(e) Barnaamijyo taageero iyo ka hortag oo loo sameeyo dadka la nool HIV, sida in loo taageero bulsho ahaan.

20. Waa in aannu jirin takoorid liddi ku ah shaqaalaha ama dadka iyaga ku tiirsan kaas oo ku salaysan xaalad sugan ama **malo** ah ee HIV si ay u helaan hababka badbaada bulshada iyo qaababaka caymiska shaqada, oo ay ku jiraan daryeel caafimaad iyo naafinimo, iyo dhimasho iyo faa'idooyin nololeed.

*Taageerid*

21. Barnaamijyo daryeel iyo taageero waa in lagu daraa nidaam dadka la nool HIV ama cudurrada xiriirka la leh ka-qaybgalin macquul ah lagu siinayo goobta shaqada, iyada oo tixgelin gaar ah la siinayo xaaladaha dalka. Shaqadu waa in loo qaabeeyaa hab ay ku qaabili karto in HIV iyo AIDS uu marba marxalad ku jiraaan, iyo dhibaatooyinka suuragalka ay ah in ay la socdaan daaweynta.

22. Xubnuhu waa in ay hormariyaan in shaqada lagu sii hayo iyo in la shaqaaleeyo dadka la nool HIV. Xubnuhu waa in ay tixgeliyaan kordhinta taageerada xilliyada la shaqeeyo iyo kuwa aan la shaqayn, oo ay ka mid yihiin halka ay lagama maarmaan tahay fursado dakhli loogu abuurayo, dadka la nool HIV ama dadka uu saameeyey HIV ama

AIDS.

23. Halka la xaqiijin karo in xiriir toos ah uu ka dhexeeyo shaqada iyo halista lagu qaadi karo AIDS ku yimid qaadista caabuqa HIV, waa in loo aqoonsadaa cudur ama shil shaqada la xiriira, si waafaqsan nidaamyada iyo qeexidaha qaranka, iyo iyada oo la tixraacayo Liiska Talo soo jeedinta Cudurada Shaqada, 2002, iyo weliba qodobbada kale ee munaasibka ah ee Ururka Shaqaalaha Adduunka.

*Baarista, waxa khaaska ah, iyo Qarsoodi*

24. Baaristu waa in ay dhab ahaantii ahaataa mid aan la isku khasbin iyo in ay ka madax banaan tahay nooc kasta oo isku khasbid ah iyo in barnaamijyada baaristu ay xushmeeyaan tilmaamaha caalamiga oo ah ee qarsoodi ahaanshaha, la talin iyo oggolaansho helid.

25. Baarista HIV ama nooc kasta oo lagu eegaayo HIV waa in aan la weydiin shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha muhaajiriinta ah, shaqo-doonka iyo shaqo codsadeyaasha.

26. Natiijada baarista HIV waa in ay ahaataa qarsoodi waana in aanay halis gelin in la shaqeeyo, muddada la shaqeynayo, ammaanka shaqada ama fursado horumar lagu tiigsanayo.

27. Shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha muhaajiriinta ah, shaqo doonka, iyo shaqo codsadeyaasha waa in aan laga weydiin dalkooda asalka ah, kan ay ku hakadaan, ama kan ay ku socdaan in ay daah furaan xogta la xiriirta HIV ee iyaga ama kuwo kale khuseysa. Helitaanka xogtani oo kale waa in lagu maamulaa xeerarka qarsoodinimada oo waafaqsan qaanuunka ka dhaqangalay ILO ee ilaalinta xog shakhsiyeedka shaqaalaha, 1997, iyo xeerarka kale ee caalamiga ah ee ilaalinta xogta.

28. Shaqaalaha muhaajiriinta ah, ama kuwa u haajiraan shaqo raadis, waa in aan ka saarin muhaajirnimada dalakooda asalka ah, kan ay ku hakadaan, ama ay kan ay ku socdaan iyada oo la eegayo xaaladdooda HIV ee dhabta ama la malada h

29. Xubnuhu waa in ay lahaadaan habab si fudud loo heli karo oo ay ku xalliyaan cabashooyinka kuwaasi oo xaqiijinaya in loo saxay shaqaalaha haddi xuquuqdooda kor ku xusan lagu xadgudbay.

*Badbaadada iyo caafimaadka Shaqada*

30. Deegaaanka shaqadu waa in uu ahaadaa mid ammaan ah oo caafimaad leh, si looga hortago isu gudbinta HIV ee goobta shaqada dhexdeeda, iyada oo la tixgelinayo Heshiiska Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada, 1981, iyo Talo soo jeedintii, 1981, Qaabdhismeedka Dhiirrigelineed ee Hashiiska Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada, 2006, iyo Talo soo jeedintii, 2006, iyo shuruucda kale ee caalamiga ah ee munaasibka ah, sida dukumentiga tilmaamaha ah ee ay wada-leeyihiin Xafiiska Shaqaalaha Adduunka iyo WHO.

31. In la qaado tallaabooyin badbaado iyo caafimaad si looga hortago in shaqaalaha ay baylah ay HIV ugu noqdaan goobaha shaqada waana in lagu daraa digniino guud, tallaaabooyin looga hortago shilalka iyo halisaha, sida tallaabooyin hay'adeed, injineeriyadda la xiriira iyo gacan ku qabashada habka loo qabto shaqada, qalab qofku isku ilaaliyo, hadba sida ay ku habboon tahay, tallaabooyin lagu xakamaynayo deegaanka, iyo daawooyinka la qaato marka qofku ay ku dhacdo qaab u ku qaadi karo ka dib iyo tallaabooyinka kale ee lagu badbaado si loo yareeyo halista in la qaado HIV iyo qaaxo, gaar ahaan shaqooyinka aadka halistoodu u badan tahay, taas oo ay qayb ka tahay waaxda daryeelka caafimaadka.

32. Marka ay suuragal tahay u baylahsanaanta HIV ee goob shaqo, shaqaaluhu waa ay ay qaataan waxbarasho iyo tababaro ku saabsan hababka isu gudbinta iyo tallaabooyinka looga hortago baylahnaanta iyo caabuqa. Xubnuhu waa in ay qaadaan tallaabooyin si loo xaqiijiyo in ka hortagid, badbaado iyo caafimaad la bixiyey taas oo loo eegaayo heerkarka ku habboon.

33. Tallaabooyin kor loogu qaadayo wacyiga waa in ay si cad u sheegaan in HIV aan la isugu gudbin jirka oo si caadi ah isu gaara iyo in joogitaanka qof la nool HIV uu joogo goob shaqo aan loo qaadan in ay tahay khatar goob shaqo.

34. Adeegyada caafimaadka shaqada iyo hannaanka goobta shaqada ee la xiriira badbaadada

iyo caafimaadka shaqada waa in ay wax ka qabtaan HIV iyo AIDS, iyada oo la tixraacayo Heshiiskii Adeegyadfa Caafimaadka Shaqada, 1985, Talo soo jeedintii, 1985, Rilmaamihii wadaagga ahaa ee ILO/WHO ee Adeegyada Caafimaadka iyo HIV/AIDS, 2005, iyo dib u eegis kasta oo oo ku xigay, iyo qodobbada caalamiga ah ee kale oo ku habboon.

*Carruurta iyo dadka da'da yar*

35. Xubnaha waa in ay qaadaan tallaabooyin lagula dagaalamayo shaqaalaynta iyo ka ganacsiga carruurta taas oo ku keeni karta xubnaha qoyska ama dadka daryeela dhimasho ama cudurro AIDS daraadii iyo in la yareeyo u nuglaanta carruurta ee HIV, iyada oo la tixgelinayo bayaankii ILO ee ku saabsanaa Xeerarka Asaasiga ah iyo Xuquuqaha Goobta Shaqada, 1998, Heshiiska da'da ugu yar ee shaqada, 1973, iyo Talosoojeedintii, 19973, iyo Heshiiskii Noocyada ugu xun ee Shaqaalaynta Carruurta, 1999, iyo Talo soo jeedintii,1999. Tallaabooyin gaar ah waa in la qaadaa si looga ilaaliyo carruurtani xadgudub galmo iyo galmo ugu dul noolaansho.

36. Xubnuhu waa in ay qaadaan tallaabooyin looga ilaalinayo shaqaalaha da'da yar in ay qaadaan caabuqa HIV, iyo in lagu daro baahiyaha gaarka ah ee carruurta iyo dadka da'da yar marka wax looga qabanayo HIV iyo AIDS siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka. Kuwani waa in ay ka mid noqdaan wabarashada caafimaadka ee taranka iyo galmada oo ujeeddo leh, gaar ahaan faafinta wargelinta ku saabsan HIV iyo AIDS iyada oo la adeegsanayo tababar xirfadeed iyo barnaamijyada iyo adeegyo lagu shaqaalaynayo da' yarta.

## V. HIRGELIN

37. Siyaasadaha qaranka iyo barnaamijyada ku saabsan HIV iyo AIDS iyo dunida shaqadu waa in:

(a) la hirgeliyaa, iyada oo lala tashanayo ururrada inta badan matala loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha iyo qaybaha kale ee ay khuseyso, oo ay ka mid yihiin hay'adaha shaqaalaha caafimaadka ee dowliga ah ama gaarka loo leeyahay ee ku habboon, mid ama tiro ka mid ah hababka soo soosocda oo wadajira:

(i) shuruucda iyo xeerarka qaran

; (ii) heshiis loo dhan yahay;

(iii) siyaasadaha qaranka iyo kuwagoobta shaqada iyo barnaamijyo hawleed, iyo;

(iv) qorsheyaasha waaxaha, iyada oo tixgelin gaar ah la siinayo waaxaha oo ay ku jiraan dadka ay ku saabsan tahay ee aadka halista ugu jira oo talo soo jeedintani khuseyso;

(b) ay ka qaybgalaan maamul garsoor oo karti u leh arrimaha shaqaalaha, iyo madaxda maamulka shaqaalaha ee dhinaca qorshaynta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada, iyo in la siiyo tababar ku saabsan arrintani;

(c) jiraan tallaabooyinka ku jira shuruucda iyo nidaamyada qaranka oo wax looga qabto jebinta waxa qofka u gaarka iyo waxa sirta ah iyo ilaalinta kale ee lagu bixiyey talo soo jeedintani

(d) ay xaqiijiyaan iskaashiga iyo isku- duwidda ka dhexaysa madaxda bulshada iyo adeegyada dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee khuseeya, kuwaasi oo ay jiraan caymis iyo barnaamijyada faa'iidada ama noocyo kale oo barnaamijyo ah.

(e) la hormariyo lana taageero dhammaan shirkadaha si loo hirgeliyo siyaasadaha iyo barnaamijyada qaranka, oo ay ku jirto iyada oo la maro silsiladdadooda sahayda iyo shabakadaha wax qaybinta, isla markaana ay ka qaybqaataan ururrada kuwa loo shaqeeyo iyo shaqaalaha lana xaqiijiyo shirkadaha ka hawlgala waaxyaha lagu habaynayo dhoofinta

ay u hoggaansameen.

(f) ay hormariyaan wada hadalka bulshada, oo ay ku jiraan wadatashi iyo wada xaajood, waafaqsan heshiiskii wadatashiga ee saddex qayboodka ahaa (Jaangooyooyinka Ahaqaalaha adduunka), 1976, iyo noocyada kale ee iskaashi ka dhexeeya madaxda xukuumadaha, hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay iyo shaqaalaha iyo wakiilladooda, iyada oo la tixgelinayo aragtida shaqadeed ee shaqaalaha caafimaadka, kuwa takhasusay HIV iyo AIDS, iyo qaybo kale oo ay ka mid yihiin ururrada matela dadka la nool HIV, ururrada caalamiga ah, ururrada bulshada ee ku habboon iyo hannaanka isku duwidda ee dalka.

(g) La dejiyaa, la hirgeliyaa, si joogta ah dib u eegid loogu sameeyaa, loona casriyeeyaa, iyada oo tixgelin la siinayo horumarka ugu casriyeysan ee sayniseed iyo bulsho iyo baahida loo qabo in la dhexgeliyo welwellada la xiriira dheddig-laboodka iyo dhaqanka.

(h) iskaashi lala yeeshaa, marka kuwo kale lagu daro, siyaasadaha iyo barnaamijyada shaqaalaha, waxtarka bulshada iyo caafimaadka; iyo

(i) la xaqiijiyaa in Xubnuhu ay shuruuc macquul ah oo ay hirgelin karaan, iyada oo tixgelin la siinayo xaaladaha qaranka, sidaa oo kale awoodda hay'adaha iyo shaqaalaha.

*Wada-hadal busho*

38. Hirgelinta siyaasaha iyo barnaamijyada ku saabsan HIV iyo AIDS waa in ay ku salaysnaadaan iskaashi iyo is aaminaad ka dhexaysa loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha iyo wakiilladooda, iyo xukuumadaha, iyada oo si firfircoon looga qaybgelinayo, iyaga oo jooga goobahooda shaqo, dadka la nool HIV.

39. Ururrada loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha waa in ay dhiirrigeliyaan ka feejignaanta HIV iyo AIDS, oo ay ku jirto ka hortagga iyo takoorid la'aanta, iyaga oo adeegsanaya waxbarasho iyo wargelin la siiyo xubnaha iyaga ka mid ah. Kuwani waa in ay ku xisaabtamaan welwellada la xiriira dheddig-laboodka iyo dhaqanka,

*Waxbarasho, tababar, wargelin iyo wadatashi*

40. Tababar, tilmaamo badbaado iyo hagid kasta oo lagama maarmaan ah ee ka dhex jirta goobta shaqada lana xiriirta HIV iyi AIDS waa in loo soo bandhigaa qaab u muuqan kara una wada gaari karaan shaqaalaha oo dhan iyo, gaaar ahaan, shaqaalaha muhaajiriinta ah, shaqaalaha cusub ama aan waayo-arag ahayn, shaqaalaha da'da yar, iyo dadka ku jira tababar, sida maxaabiista iyo tababateyaasha. Tababarka, amarrada iyo tilmaamaha waa in ay u feejigan yihin arrima dheddig-laboodka iyo arrimaha dhaqanka waana in la waafajiyaa tilmaamaha shaqaalaha goobta shaqada, iyada oo la tixgelinayo arrimaha halista ku ah xoogagga shaqada.

41. Macuumaad bulsho-shaqaale oo waqtiga la joogo la halmaala oo qaab sayniseed lagu soo ururiyey, iyo, halka ay ku habboon tahay, waxbarasho iyo tabar ku saabsan HIV iyo AIDS waa in loo helaa kuwa loo shaqeeyo, maareyeyaasha iyo wakiillada shaqaalaha, si loogu caawiyo in ay ka qaadaan tallaabooyinka ku habboon goobta shaqada.

42. Shaqaalaha, oo ay ku jiraanm maxaabiista, tababartayaasha iyo kuwa lacag la'aanta ku shaqeeya waa in ay helaan wargelin kor loogu qaadayo wacyigooda iyo tababarrada munaasibka ah ee hababka lagu xakamaynayo caabuqa HIV marka loo eego shilalka ka dhaca goobta shaqada iyo gargaarka degdegga ah. Shaqaalaha ay shaqadoodu ay halis gelinayso in ay baylah u yihiin dhiigga aadanaha, waxyaabaha laga sameeyo dhiiga iyo dheecaannada kale ee jirka waa in ay helaan tababarro dheeraad ah ee looga hortagayo baylahsanaanta, hababka diiwaangelinta baylahnaanta iyo ficillada la samaynayo ka dib marka qofku ay halis uu ku qaadi karo caabuqa ay la soo gudboonaato.

43. Shaqaalaha iyo wakiilladooda waa in ay xaq u leeyihiin in la wargeliyo oo la tashi laga la yeesho tallaabooyinka lagu hirgelinayo siyaasadaha iyo barnaamijyada goobta shaqo ee la xiriira HIV iyo AIDS. Shaqaalaha iyo wakiillada loo shaqeeyaha waa in ay ka qaybqaataan kormeerada goobta shaqo si waafaqsan hawlqabadyada qaranka.

*Adeegyada bulsho*

44. Kaalinta maamulka adeegyada shaqaalaha, oo ay ka mid tahay kormeerka shaqaalaha, iyo madaxda garsoorka ee ku hawlan arrimaha shaqaalaha, si wax looga qabto HIV iyo AIDS, waa in dib u eegis lagu sameeyaa, haddii ay lagama maarmaan noqotana, la xoojiyaa.

45. Qaabdhismeedka adeegyada bulshada waa in la xoojiyaa waana in ay raacaan tilmaamaha wadaagga ah ee WHO/ILO ee ku saabsan adeegyada caafimaadka iyo HIV/AIDS, 2005, iyo dib u eegistii kale ee ka dambeysay, si loo caawiyo xaqiijinta in galaangal ballaaran loo yeeshey ka hortagga, daaweynta, daryeelka iyo taageeridda bukaanka, iyo si looga yareeyo culayska dheeraadka ah ee adeegyada bulshada saaran, gaar ahaan shaqaalaha caafimaadka, kaas oo uu sababey HIV iyo AIDS.

*Iskaashi caalamiga ah*

46. Xubnaha waa in ay iskaashadaan, iyaga oo adeegsanaya heshiisyo laba geesood ama dhinacyo badan, iyaga oo ka qaybgalaya habab dhinacyo badan ama habab kale oo wax ku ool ah, si loo dhaqangeliyo talo soo jeedintani.

47. Tallaabooyin lagu xaqiijinayo galaangal u lahaanshaha adeegyada ka hortagga HIV , iyo daaweyntiisa , daryeelka iyo taageerada shaqaalaha muhaajiriinta ah waa in ay qaadaan dalalka asal ahaan ay ka soo jeedaan, ku hakadaan iyo kuwa ay ku sii jeedaan, iyo in heshiisyo dhexdooda ah ay ka gaaraan waddamada ay khuseyso, mar Allaale markii ay u habboon tahay.

48. Iskaashi caalami ah waa in la dhiirrigeliyaa oo u dhexeeya xubnaha, hay'adahooda qaran ee ku saabsan HIV iyo AIDS iyo ururrada caalamiga ee ku habboon waana in lagu daraa xog ama war is-dhaafsi habeysan oo ku saabsan dhammaan tallaabooyinkii la qaaday si wax looga qabto HIV-ga.

49. Xubnaha iyo ururrada dhinacyada badan waa in feejignaan gaar ah siiyaan iskaashiga iyo kheyraadka lagama maarmaanka ah si loo daboolo baahiyaha dalalka oo dhan, gaar ahaan dalalka uu ku badan yahay, marka la diyaarinayo qorsheyaasha iyo barnaamijyada caalamiga ah ee ka hortagga, daaweynta, daryeelka iyo taageerada caabuq uu keenay HIV iyo cudurrada fursad-gaadka ah ee kale iyo kansarka la xiriira HIV.

50. Xubnaha iyo ururrada caalamiga ah waa in ay isku dayaan dhimidda qiimaha sahayda nooc kasta oo ay tahay, si looga hortago, loo daaweeyo, loona daryeelo caabuqa uu keenay HIV iyo cudurrada kale ee fursad-gaadka ah iyo kansarka la xiriira HIV.

## VI. LA SOCODKA

51. Xubnaha waa in ay dhisaan qaab ku habboon ama ay ka faai'deystaan kan hadda jira, marka ay kormeerayaan horumarka laga sameeyey marka loo eego siyaasaddooda qaranka ee ku wajahan HIV iyo AIDS iyo shaqada la qabto, sidaa oo kale marka ay sameynayaan talo ku saabsan ansixintiisa iyo hirgelintiisa.

52. Ururrada ka wakiilka ah shaqaalaha iyo xoogsatada ugu badan waa in ay wakiillo ku lahaadaan, iyaga oo siman, hababka loo kormeerayo horumarka la sameeyey marka loo eego siyaasadda qaranka. Waxa kale oo jira, ururradani waa in lagala tashadaa qaabka sida ugu badan ee suuragalka ah, iyada oo la tixgelinayo aragtida ururrada dadka la nool HIV, warbixinnada khubarrada ama daraasado farsameed.

53. Xubnaha waa in, ilaa iyo intii suuragal ah, ay soo ururiyaan war iyo xog xisaabeed faahfaasan iyo in ay ku sameeyaan cilmi-baaris horumarka heerar qaran iyo qaybeed marka loo fiiriyo HIV iyo AIDS ee ku dhex jira dunida shaqada, iyada oo la tixgelinayo sida uu ugu kala badan yahay ragga iyo haweenka iyo qodobboada kale oo u habboon.

54. Iyada oo la raacinayo habka warbixinta ee lagu xusay qodobka 19aad ee Dastuurka Ururka Shaqaalaha Adduunka, dib u eegis joogta ah oo ku saabsan hawlaha la qabtay oo ku salaysan talo soo jeedintani ayaa waxa lagu dari karaa warbixinta qaranka ee loo dirayo UNAIDS iyo warbixinnada ku xusan shuruucda caalamiga ee ku habboon.

**Qaraarro lagu ansixiyey shirweynihii Ururka Shaqaalaha Adduunka kalfadhigiisii 99aad (Geneva, Juun, 2010)**

## Qaraar ku saabsan dhiirrigelinta iyo hirgelinta talo soo jeedin la xiriirta HIV iyo AIDS iyo hawsha la qabto, 2010

Shirkii guud ee Ururka Shaqaalaha Adduunka, oo uu ku kulmay kalfadhigiisii 99aad , 2010,

Isaga oo ansixiyey talo soo jeedintii ku saabsanayd HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada, 2010,

Isaga oo xusaya in ka miro dhalinta talo soo jeedintu ay ku xiran tahay habsami u dhiirrigelinta iyo u hirgelinta waxyaabaha iyada lagama maarmaanka u ah,

Isaga oo maanka ku haya waajibaadka ugu muhiimsan ee ururku uu yahay in la la helo shaqo habboon iyo hawl joogto u socota,

Isaga oo ogsoon in uga qaybqaadashada ILO ee Urur Saddex Qayboodle ahaan Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Wadarjirka ah ee HIV iyo AIDS (UNAIDS) ee dadaallada ku wajahan in wax laga qabto HIV iyo AIDS,

1. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka ee Ururka Shaqaalaha Adduunka in la qoondeeyo maaliyadda miisaaniyadda hadda jirta iyo in la raadiyo miisaaniyad kale oo dheeri ah oo wax looga qabanayo hawsha saddexda qaybood ah si ay u dhaqangasho talo soo jeedinta ku dhex jirta dunida shaqada,
2. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka uu tallaabo qaado si loo kobciyo dadaallada iskaashiga ee uu la leeyahay ururrada kala duwan ee caalamka ee la xiriira HIV iyo AIDS iyo Dunida Shaqada
3. Guddiga maamulka u soo jeedinayaa codsi ah in la dhiso qorshe hawleed caalami ah si loo gaaro hirgelin ballaaran ee talo soo jeedinta loona yareeyo saamaynta HIV iyo AIDS ay ku leeyihiin goobta shaqada. Tani waa in lala diyaariyaa wakiillada ururrada loo shaqeeyo iyo kuwa shaqaalaha, iyada oo tixgelin la siinayo aragtiyada UNAIDS, ururrada dadka la nool HIV iyo AIDS, iyo qaybaha ee ku habboon.
4. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka in Agaasimaha Guud uu codsado in dalalka ay siiyaan tixgelin bixinta kharajka loogu talagalay iskaashiga farsamo ee xafiiska. Waddamada xubnaha ka ah, ururrada wakiilka ka ah kuwa loo shaqeeyo iyo shaqaalaha ee ugu badan waxa ay codsan karaan taageero lagu hirgeliyo talo soo jeedinta meelaha sida:

   a) in la helo taageero farsamo oo lagu diyaariyo laguna hirgeliyo siyaasadaha iyo barnaamijyada iyo xeerarka saddexda qaybood ah ee qaranka, si loo gaaro waxyaabaha daruuriga u ah soo jeedintan,

   b) in la siiyo la siiyo taageero awood dhisid ah dhinaca tababaridda, war-gaarsiin, kormeer, hirgelin iyo u qareemeynta, tusaale ahaan:


   (i) in la diyaarinyo barnaamijyo iyo agab tababar si loo dhiso awoodda, oo ay ka mid yihiin kuwo diiradda lagu saarayo waaxo gaar ah;



   (ii) in la tababaro horjooyaasha HIV iyo AIDS ee goobta shaqada iyo aqoonyahannada, oo ay ka mid yihiin wakiillada kuwa loo shaqeeyo iyo shaqaalaha iyo maamulayaasha shaqaalaha;


   (iii) in la diyaariyo agab dhiirrigelin iyo u-qareemeyn oo la xiriira talo soo jeedinta; iyo

(iv) in la qabto siminaarro iyo tababaro heer qaran ah oo lagu dhiirrigelinayo Talo soo jeedinta.

5. Waxa uu soo jeedinayaa in dowladaha xubnaha ka ah ay adeegsadaan hannaanka hadda jira ama ay dhisaan hannaan kale oo heer qaran ah si dib u eegid loogu sameeyo horumarka la sameeyey, iyo si loo kormeero waxyaabaha soo kordha loona wadaago tusaaleyaasha waxqabadka wanaagsan iyo barnaamijyada qaranka ee ku saabsan HIV iyo AIDS ee ku habboon dunida shaqada.
6. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka in laga codsado warbixinno joogta ah dowladaha xubnaha ka ah taas oo ku saleysan qodobka 19aad ee Dastuurka ILO oo uu qayb ka noqdo hannaanka warbixinta ee hadda jira, gaar ahaan xog ururinta guud. Warbixinnada xukuumadaha ee la xiriira HIV iyo AIDS waa in la diyaariyaa iyada oo la tashi lala samaynayo ururrarda wakiilka ka ah kuwa loo shaqeeyo iyo shaqaalaha, oo ay ka mid yihiin horumarka la sameeyey oo halka ay suuragal ka tahayna, tusaalooyin laga bixiyaa waxa la qabtay.
7. Uu soo jeedinaya Guddiga maamulka in ay si joogta ah dib ugu eegaan horumarka laga sameeyey hirgelinta talo soo jeedinta.
8. U soo jeedinayaa Guddiga maamulka in dowladaha xubinta ka ah ku dhiirrigeliyo ballaarinta qodobka 1(1)(ii) ee Heshiiska takooridda ( Shaqada iyo Shaqaalaha), 1958, si markaa ilaalinta lagu xusay Heshiiskaa loogu ballaariyo xaalad HIV dhab ah ama la aaminsan yahay jiritaankeeda.






ISBN 978-92-2-123819-5

9 789221 238195